

JAMHUURIYADDA
SOMALILAND



REPUBLIC OF SOMALILAND
جمهورية صوماليلاند

XAFIISKA MADAXWEYNAHA
OFFICE OF THE PRESIDENT

مكتب الرئيس

Tix: JSL/XM/GW/081-285/072026

Taariikh: 13/07/2026

Wareegto Madaxweyne

Dhaqan-gelinta Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Maamulka
Tamarta Somaliland, Xeer Lr. 81/2026

Markii aan arkay: Qoddobka 90^{aad} ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

Markii aan arkay: Qodobada 75^{aad} iyo 76^{aad} ee Dastuurka Jamhuuriyadda
Somaliland.


Markii aan helay: Go'aanka Golaha Wakiillada (Go'aan Lr. GW/KF-14/16/2026),
summaddiisuna tahay Tixraac: GW/G/12/201/2026, kuna
taariikhaysan 24/06/2026, ee lagu ansixiyey Wax-ka-beddelka
iyo Kaabista Xeerka Maamulka Tamarta Somaliland, Xeer Lr.
81/2026.

Waxa aan soo-saaray:

Wareegtadan oo lagu dhaqan-gelinayo laguna faafinayo Wax-ka-beddelka iyo Kaabista
Xeerka Maamulka Tamarta Somaliland ee Xeer Lr; 81/2026.

ALLAA MAHAD LEH

Cabdiraxmaan Maxamed Cabdillaahi (Cirro)
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland





Ku: Madaxweynaha JSL

=Madaxtooyada=

Md: Cabdiraxman Maxamed Cabdillaahi

Ujeeddo: Go'aanka Ansixinta Diidmada Dib U-soocelinta Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Maamulka Tamarta Somaliland Xeer.Lr.81/2026.

GOLAH WAKIILLADA JAMHUURIYADDA SOMALILAND

Kaddib Markuu Arkay:

Qoraalka sumaddiisu tahay **JSL/XM/GW/081-26806/2026** ee ku taariikhaysan **06/06/2026** isla markaana au jeeddadiisu tahay Dib U-soocelinta Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Maamulka Tamarta Somaliland **Xeer.Lr.81/2026**.

Kaddib Markuu Darsay:

Nuxurka asbaabaha Dibu-soocelinta Xeerka ee ku faahfaahsan qoraalka Madaxweynaha ee kor ku taariikhaysan. .

Kaddib Markuu Tix-raacay:

Habraaca loo marayo Xeerarka Madaxweynuhu soo celiyo ee lagu jideeyay Qodobka **78^{aad}** farqadiisa **4^{aad}** Ee Datuurka oo nuxur ahaan u dhgan sidan "*haddii uu sababaha Madaxweynuhu u cuskaday ku qanci waayo , oo masruuc-sharcigaasi uu mar labaad ku anixiyo aqlabiyad ^{2/3} (Saddex Meeloodoow Laba) xubnaha golaha, mashruc-harcigaasi waa inuu Madaxweynuhu aqbalaa haddiise aqlabiyaddu intaa ka yaraato mashruuc-sharcigaasi wuxuu burayad*" iyo qodobka **39^{aad}** faqadiisa **5^{aad}** ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada **Xeer.Lr.01/2021** oo nuxur ahaan waafaqaysa qodobka kor ku xusan ee dastuurka.

WUXUU U CODEEYAY

1. Goluhu isaga oo tix-raacaya habraca la xidhiidha Dib U-soocelinta Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Maamulka Tamarta Somaliland **Xeer.Lr.81/2026** si waafaqsan dastuurka iyo iyo Xeer-hoosaadka, wuxuu fadhigisii 11^{aad} ee Kal-fadhiga 14^{aad} oo ku taariikhaysan 21/06/2026, wuxuu Cod aqlabiyad ah (59 cod) oo gacan taag ah ku ansixiyay diidmada Dib-U-soocelinta Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Maamulka Tamarta Somaliland **Xeer.Lr.81/2026**, hal (1) Mudane ayaa ogolaaday, laba (2) Mudane-na way ka aamuseen halka Gudoomiyuhuna aanu codayn.
2. Sidaa awgeed, Goluhu wuxuu mar labaad Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Maamulka Tamarta Somaliland **Xeer.Lr.81/2026** ku ansixiyay cod aqlabiyad ah oo ah (^{2/3} *Saddex meeloodoow Laba*)

Hadaba, Madaxweynaha JSL waa in uu sidaa ku aqbalaa isla markaana ku saxeexaa si dastuurka waafaqsan.

ALLAA MAHAD LEH

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xog/ Guud ee Golaha Wakiillada JSL



Maaxamuud Xiir (Faratoon)
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL



JAMHUURIYADDA SOMALILAND
GOLAHA WAKIILLADA



Xeerka Maamulka Tamarta Korontada
Somaliland
Xeer Lr: 81/2026



Golaha Wakiillada JSL

- Markuu arkay: -** Qodobka 11aad (2), qodobka 12 (6) iyo qodobbada 53aad, 54aad, 55aad, 77aad iyo 78aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.
- Markuu aqoonsaday: -** Doorarka muhiimka ah ee ay tamartu kaga jirto horumarka Somaliland.
- Isagoo ka warqaba: -** Nabaadguurka sii kordhaya ee aan laga soo kaban karaynin oo ay sabab u tahay (loo aanaynayo) dhirta laga shidaayo dhuxusha ee loo adeegsado tamarta cunto karinta, qiimaha shidaalka iyo tamarta kale oo aan degganayn korna u sii kacaaya Somaliland.
- Isagoo aqoonsan: -** In aanu jirin nidaam sharci oo lagu maamulo Maalgelinta tamarta.
- Isagoo ogsoon: -** Baahida loo qabo in sida ugu dhakhsaha badan loo abuuro Komishanka Nidaaminta Tamarta Somaliland, si uu u habeeyo nidaamka maalgashiga tamarta iyo ilaalinta xuquuqda isticmaalaha tamarta (consumer protection).
- Isagoo garawsan:** Muhiimadda ay leedahay in la helo tamarta korontada oo jaban taas oo kor u qaadi karta koboca dhaqaale oo joogta ah iyo xasilloonida dalka.

Wuxuu Ansixiyay

Wax ka badelka iyo Kaabista
Xeerka Maamulka Tamarta Korontada Somaliland
Xeer Lr: 81/2026



CUTUBKA 1AAD QODOBBO GUUD

Qodobka 1aad

Magaca Xeerka

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa “ Xeerka Maamulka Tamarta Korontada Jamhuuriyadda Somaliland” Xeer Lr. 81/2026.

Qodobka 2aad

Erey Bixin

Haddii tuduca ay ku jiraan, aanu micno kale u yeelin kalmadaha iyo weedhaha soo socda waxay yeelanayaan macnaha ku hor qoran:

1. **Koronto/da:** Waxa loola jeedaa awoodda koronto ee laga dhaliyay naafto/shidaal, tamarta fallaadhaha qorraxda, tamarta dabaysha, qaaca dhulka iyo ilo tamareed kale oo kasta oo sharciyan la oggolyahay in awood koronto laga dhaliyo.
2. **Tamar koronto:** Waxa loola jeedaa awoodda koronto ee la dhaliyo, la gudbiyo, la qaybiyo.
3. **Adeeg/ga koronto/da :** Waxa loola jeedaa awood koronto uu adeeg bixiye gaadhsiiyo ama u fidiyo macaamiisha.
4. **Adeeg bixiye:** Waxa loola jeedaa ruqsadlaha macaamiisha siiya adeeg koronto.
5. **Khidmadda Korontada:** Waxa loola jeedaa shaxda qiimayawga ee lagu jaan goynaayo qiimaha khidmadda adeeg koronto ee la oggol yahay in adeeg bixiye ka qaado macaamiisha uu siiyo adeeg koronto.
6. **Agaasimaha Guud:** Waxa loola jeedaa Agaasimaha Guud ee Guddida Komishanka ee loo magacaabo si waafaqsan qodobka 23aad ee xeerkan.
7. **Tamarta cusboonaata:** Waxa loola jeedaa ilo tamareedyada dabiiciga ah ee laga dhaliyo korontada sida dabaysha, fallaadhaha cadceedda, mawjadaha badda, biyaha, qaaca dhulka iyo qashinka aan sunta ahayn.
8. **Qof /cid:-** Waxa loola jeedaa qof bani aadam ah ama shaqsiyad qaanuuni ah.
9. **Ruqsadle:-** Waxa loola jeedaa cid kasta oo haysata ruqsad komishanku uu u siiyay hawlaha koronto ee xeerkan dhigayo.
10. **Xarun koronto dhalin:** Waxa loola jeedaa xarun lagu dhaliyo awood koronto, taas oo ka kooban dhismaha iyo mashiinnada ama agabka loo isticmaalo koronto dhalinta iyo dhulka ay ku fadhido xarunta dhalinta awoodda koronto ama dhulka loo qorsheeyey xarun laga dhaliyo awood koronto dhalin.
11. **Koronto dhalin:** Waxa loola jeedaa dhalinta awood koronto laga dhaliyo shidaal, fallaadhaha qorraxda, dabaysha, qaaca dhulka ama ilo tamareedyo kale oo sharcigu oggolyahay in awood koronto laga dhaliyo.
12. **Koronoto Qaybin:** Waxa loola jeedaa qaybinta awoodda koronto ee heerarka foolteyyada hoose iyo dhexe ee awood koronto lagu gaadhsiiyo macmiil ama macaamiisha.
13. **Koronta gudbin:** Waxa loola jeedaa gudbinta awoodda korontada ee lagu gudbiyo foolteyyada heerarka sar sare.



14. **Macmiil:** Waxa loola jeedaa cid kasta oo loo fidiyay ama xaq u leh in loo fidiyo tamar koronto uu ku isticmaalo hoygiisa, meherad ganacsi, warshad ama tafaariiqle adeeg koronto oo laga iibiyay koronto si uu uga sii iibiyo cid isticmaasha.
15. **Ruqsad:** Waxa loola jeedaa oggolaanshiyo qoraal rasmi ah oo uu komishanku si waafaqsan xeerkan u bixiyay una siiyay cid uu u oggolaaday in ay gasho ama ka ganacsato hawlaha korontada ee xeerkani khuseeyo.
16. **Ruqsad koronto dhalin:** Waxa loola jeedaa ruqsad uu komishanku si waafaqsan xeerkan u siiyay cid loo oggolaaday fulinta koronto dhalin.
17. **Ruqsad koronto qaybin:** Waxa loola jeedaa ruqsad uu komishanku siiyay cid uu u oggolaaday in ay gasho ama ka ganacsato koronto qaybin.
18. **Ruqsad iib tafaariiq:** Waxa loola jeedaa ruqsad uu komishanku si waafaqsan xeerkan u siiyay cid uu ugu oggolaaday in ay awood koronto ka jilmadato ruqsadle qaybin koronto si uu uga sii iibiyo macaamiisha isticmaasha awoodda korontada.
19. **Ruqsadlaha dhalin koronto:** Waxa loola jeedaa ruqsadle haysta ruqsad koronto dhalin.
20. **Ruqsadlaha qaybin koronto:** Waxa loola jeedaa ruqsadle haysta ruqsad koronto qaybin.
21. **Awood koronto heerarka foolteyyada hoose iyo dhexe:** Waxa loola jeedaa awoodda koronto ee heerarka foolteyyada ka hooseeya 66 KW kana yarayn 11 KW hadba sida uu cayimo xeeridaamiye.
22. **Awood koronto heerarka foltayyada sare:** Waxa loola jeedaa awoodda koronto ee lagu gudbiyo heerarka foolteyyada ka sarreeya 66 KW kana sarraysn 132KW
23. **Shirkadda Gudbinta Korontada ee Somaliland:** Waxa loola jeedaa Shirkadda Gudbinta Korontada Somaliland ee uu aasaasay qodobka 47aad ee xeerkani
24. **Shabakadda iskuxidhka Koronto gudbinta:** Waxa loola jeedaa shabakadda gudbinta korontada oo ah shabakad koronto oo kulansiisa iskuna xidha nidaamyada koronto dhalinta, koronto gudbinta, koronto qaybinta iyo gudbinta awoodda korontada, si loogu gaadhsiyo macaamiisha adeegga korontada.
25. **Habraaca Shabakadda isku xidhka Koronto gudbinta:** Waxa loola jeedaa Xeerhoosaadka habraaca hawlgallada iyo mabaadii'da lagu maamulayo xidhiidhka ka dhaxeeya isticmaalayaasha iyo Shirkadda Gudbinta Korontada Qaranka.
26. **Koronto:** Waxa loola jeedaa awood koronto oo laga dhaliyay naafto/shidaal ama ilo tamareedyada dabiiciga ah sida fallaadhaha cadceedda, dabaysha, qaaca dhulka, mawjadaha badda, biyaha iyo ilo tamareedyo kale oo kasta oo sharciyan la oggolyahay in awood koronto laga dhaliyo.
27. **Komishanka:** Waxa loola jeedaa Komishanka Nidaaminta Korontada Somaliland ee ku xusan qodobka 8aad ee xeerkan.
28. **Guddida ama Guddida Komishanka:** Waxa loola jeedaa guddida komishanka ee ku xusan qodobka 12aad ee xeerkan.
29. **Wasiir:** Waxa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta.
30. **Wasaarad:** Waxa loola jeedaa Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta.
31. **Xeerka la nasaqay:** Waxa loola jeedaa xeerkii hore ee tamarta Korontada Xeer Lr.81/2018.
32. **Kormeeraha Korontada:-** Waxa loola jeedaa qof kasta oo uu komishanku u magacaabay gudashada xilka kormeeridda ruqsadlaha korontada, si waafaqsan qodobka 60 aad ee xeerkan.



33. Baadhis Koronto:- Waxa loola jeedaa baadhis kasta oo ku lug leh adeegyada, xarumaha, qalabka ama guud ahaan hawlaha ruqsadlaha korontada taasoo lagu hubinaayo u hoggaansanaantiisa xeerkan iyo habraacyada ka dhashay ee kale.
34. Qandaraasle Farsamo: Waxa loola jeedaa qof kasta ama shirkad kasta oo qandaraasle koronto ah ama shahaado xirfadeed oo hawlaha korontada la'xidhiidha haysta oo oggolaansho ruqsadeed ka haysta komishanka, si uu u fuliyo qandaraas koronto ama hawlo farsamo oo laxidhiidha rakibidda, dayactirka, hagaajinta qalabka korontada. nashqadaynta, dhisidda ama dayactirka kaabayaasha, xadkaha gudbinta, qaybinta iyo dabgalinta dhismayaasha si waafaqsan xeerkan iyo xeeridaamiyayaasha ka dhashay ee xeerkan lagu jideeyey.
35. Koronto gelinta miyiga:- Waxa loola jeedaa barnaamij ama mashruuc lagu fidinaayo ama lagu gaadhsiinaayo adeegyada korontada meelaha aan hore u lahayn ama u gaadhin adeegyadaasi, si gaar ah miyiga iyo deegaannada kale ee ka fog magaalooyinka.
36. Deeqaha:- Waxa loola jeedaa waxii taakulo farsamo iyo dhaqaale ah oo ku aaddan tamarta ee deeq bixiye ugu deeqo dawladda Soomaaliland.

Qodobka 3aad

Xadka Dabaqaada Xeerkan

Xeerkan waxa lagu dabbaqayaa :

1. Nidaaminta dhalinta, gudbinta, qaybinta iyo ka ganacsiga awoodda tamarta korontada.
2. Ruqsadsiinta iyo kormeerka hawlaha wadaagga tamarta korontada.
3. Xarumaha iyo qalabka ama bedqabka tamarta korontada iyo arrimaha la halmaala. bedqabka iyo badbaadada ee gudaha xuduudaha Jamhuuriyadda Somaliland.
4. Guud ahaan maamulka korontada Somaliland.
5. Dhawrista danaha macmiilka (protection of the interests of consumers).
6. Helidda tamar koronto oo qiimo jaban ah, lehna tayo sare oo tamareed.
7. Ilaalinta bedqabka degaanka.
8. Horumarinta, nidaaminta iyo fidinta adeegga koronto ee miyiga iyo deegaannada fogfog ee aan adeegga koronto lahayn iyo kan xuduudaha iskaga gudba (cross-border electricity trade).

Qodobka 4aad

Ujeedooyinka Xeerka .

Ujeedooyinka Xeerkani waa:

1. Horumarinta iyo taabbagalinta siyaasadda tamarta korontada ee Qaranka.
2. Abuurista hannaan sharci iyo maamul oo nidaamiya aagga iyo suuqa adeegga korontada ee dalka.
3. Aasaasidda Komishanka Nidaaminta Korontada ee Somaliland iyo Shirkadda Gudbinta Korontada ee Somaliland;
4. Qeexidda doorka Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macdantu ku leeyahay maamulka aagga korontada iyo suuqa adeegga korontada.
5. Ujeedooyinka gaar ka ah ee xeerku waa:



6. Nidaaminta iyo taabaggalinta suuqa adeegga korontada oo ku salaysan tartan caddaalad.
7. Dhismaha, hirgalinta iyo maaraynta shabakadda gudbinta korontada iyo hannaanka iskuxidhka nidaamyada dhalinta, gudbinta iyo qaybinta ee Jamhuriyadda Somaliland.
8. Ilaalinta xuquuqaha iyo danaha macaamiisha iyo adeeg bixiyayaasha korontada.
9. Dejinta nidaamka ruqsaddaha hawlaha korontada.
10. Dhiirrigalinta iyo fududeynta maalgashiga tamarta korontada, iyada oo tixgalin gaar ah la siinayo maalgashiyada maxaliga ah.
11. Dejinta halbeegyada tayada addeegga, qalabka korontada nidaamyada iyo habraacyada loo maraayo dhalinta, qaybinta, gudbinta, iibinta iyo isticmaalka korontada.
12. Dhiirrigalinta iyo fududeynta horumarinta ilaha tamarta cusboonaanta sida tamarta dabaysha, qaaca dhulka hoostiisa, fallaadhaha qorraxda, mawjadaha badda IWM.
13. Horumarinta, ballaadhinta iyo gaadhsiinta adeegyada korontada degaannada miyiga ah iyo deegaannada aan adeegyo koronto helin, si loo yareeyo farqiga u dhexeeya degaannada miyiga iyo kuwa magaalooyinka.
14. Dhiirrigalinta iyo dejinta siyaasado lagaga ilaaliyo waxyeelada deegaanka kasoo gaadha hawlaha korontada iyo hirgelinta habraacyo lagu kordhinaayo waxtarka isticmaalka tamarta (energy efficiency)."
15. Abuurista iyo nidaaminta suuq tamareed oo hufan oo dhiirrigeliya tartan suuq xor ah oo ay cadaaladi ka jirto, isla markaana u gogol xaadhaaya ganacsiga iyo isku xidhka korontada dalka.

CUTUBKA 2AAD

DOORKA WASIIRKA EE MAAMULKA TAMARTA KORONTADA

Qodobka 5aad

Hawlaha iyo Awoodaha Wasiirka

1. Wasiirku wuxuu u xilsaaran yahay fulinta hawlaha iyo awoodaha wasaaradda; wuxuuna masuul ka yahay hoggaaminta iyo korjoogtaynta suuqa adeegga tamarta korontada, si uu xilkiisa u gutana wuxuu :
 - B) Diyaarinayaa, dibu'eegisna ku samayn doonaa siyaasadaha dawladda ee ku aaddan suuqa adeegga korontada .
 - T) Diyaarinayaa, baahinayaa, dibu'eegisna ku samaynayaa siyaasadaha, qorshayaasha iyo tubaha fulinta horumarinta tamarta korontada.
 - J) Diyaarinyaa, xaqiijinayaana in la fuliyo tallaabooyin dhiirrigalinaya korna u qaadaya koronto galinta reermiyiga.
 - X) Qaadayaa dhammaan tallaabooyinka ku habboon ee lagama maarmaanka u ah in la soo jiito maalgashi gaar loo leeyahay ama ka qayb galayaal kale soo galaan qayb ama qaybo ka mid ah suuqa adeegga korontada ee uu u arko in ay habboon tahay.
 - Kh) Diyaarinayaa siyaasado, tabo fulineed iyo tallaabooyin dhiirrigalinya korna u qaadaya horumarinta tamarta korontda iyo fidinta baaxadda iyo helidda awood



koronto la'goyn karo, la'iskuna hallayn karo, waxna ka tarta horumarka dhaqandhaqaale iyo bulsho ee dalka.

D) Dejinayaa siyaasado iyo tallaabooyin lagu dhiirrigalinaayo korna loogu qaadayo horumarinta, soosaarka, suuq gaynta iyo isticmaalka tamarta cusboonaata.

R) Dejinayaa siyaasado loo raaco soo dejinta iyo dhoofinta korontada.

S) Xaqiijinayaa in la baadho warbixinna looga keeno khataraha ama masiibooyinka ka dhasha korontada.

2. Iyada oo ay sideeda ahaanayaan masuuliyadahiisa ku xusan farqadda 1aad ee kore, wasiirku:

B) Wuxuu awood u leeyhay ka jawaabista iyo isuduwidada xaaladaha degdegga ah, isagoo kaashanaya komishanka iyo ruqsadlaha ay khuseyso.

T) Fulinayaa masuuliyadaha iyo hawlaha kale ee khuseeysa aagga iyo suuqa adeegga tamarta korontada ee uu xeerkan ama xeer kale u xilsaaray wasaaradda ama wasiirka, ama aannu xeerkan si cad u siinin ama ugu xilsaarin komishanka.

Qodobka 6aad

Siyaasadda Tamarta Korontada Qaranka

1. Wasiirku wuxuu, isagoo latashanaya dhammaan daneeyayaasha ay khusayso, diyaarin doonaa, baahinna doonaa kaddib marka Golaha Wasiiradu uu ansaxiyo siyaadda tamarta korontada ee Qaranka, taas oo saddexdii sanno ee walba dibu'eegis ku samayn doona.
2. Wasiirku wuxuu saddex bilood gudahood kaddib dhammaadka sannad miisaaniyadeed walba diyaarin doonaa oo uu baahin doonaa warbixinta fulinta siyaasadda tamarta korontada ee Qaranka.

Qodobka 7aad

Qorshaha Tamarta Korontada Qaranka

1. Wasiirku wuxuu, isagoo latashanaya dhammaan daneeyayaasha ay khusayso diyaarinayaa, baahinayaa oo uu dibu'eegisna ku samaynayaa qorshaha tamarta korontada oo ay kujiraan qorshayaasha tamarta cusboonaata iyo awoodda korontada, si loo xaqiijiyo fidinta adeeg koronto oo qiimo ahaan la wada heli karo, la awoodi karo, la iskuna hallayn karo, isla markaana bedqaba.
2. Adeeg bixiye kastaa wuxuu isagoo ku salaynaya adeegyada uu bixiyo diyaarinayaa qorshaha adeegga koronto ee uu fulin doono, isla markaana u gudbin doonaa wasiirka, isagoo komishanka u sii marinaaya.
3. Gole deegaan kasta iyo gobol kastaa wuxuu diyaarin doonaa qorshihiisa koronto oo waafaqsan qorsha guud ee korontada Qaranka, isla markaana u gudbin doonaa wasaaradda.
4. Wasiirku wuxuu isugayn doonaa qorshayaasha loogu soo gudbiyo sida ku xusan farqadaha kore, waxaanu ka soo saari doonaa qorshaha midaysan ee tamarta korontada Qaranka, qorshahaas oo saddex sannadood walba dibu'eegis lagu samayn doono.
5. Qorshaha korontada Qaranku, waa in uu:
 - a. Ka turjumayo ama la jaanqaadayo siyaasadda korontada Qaranka iyo qorshaha horumarka Qaranka.
 - b. Noqdaa hannaan si hufan u haga maalgalinta kaabayaasha adeegyada korontada.



- j. Tixgalin siinayo dhallinta iyo fidinta dhammaan adeegyada koronto ee suurtagalka ah.
 - x. Tilmaamayo xulashada farsamada teknoolaji ee ku habboon buuxinta baahida korontada.
6. Wasiirku wuxuu soo saari doonaa wareegto wasiir ama xeernidaamiye, xeeriya muddada lagu diyaarinayo iyo tibaaxaha qorshaha korontada.
 7. Wasiirku wuxuu kormeer iyo qiimayn ku samayn doonaa fulinta qorshaha adeegga korontada ee Qaranka, waxaanu saddex bilood gudahood kaddib, dhammaadka sannad miisaaniyadeed walba diyaarin doonaa oo uu baahin doonaa warbixinta fulinta qorshaha korontada ee Qaranka.

CUTUBKA 3AAD
KOMISHANKA NIDAAMINTA KORONTADA
Qodobka 8aad

Aasaasidda Komishanka Nidaaminta Korontada

1. Waxa xeerkan lagu aasaasay Komishanka Nidaaminta Tamarta Somaliland oo loo soo gaabiyay Komishanka.
2. Komishanku waxa uu yeelanayaa shaqsiyad qaanuuni ah oo leh jiritaan sharci iyo shaambad u gaar ah, awood sharci ahna u leh:
 - b. Inuu si sharciga waafaqsan u yeesho ama hantiyo, uguna tagrifalo hanti guurto ah iyo hanti maguurto ah.
 - t. Inuu magaciisa cid kula galo heshiis ama cid ku dacweeyo ama lagu dacwayo iyo
 - j. Inuu fuliyo hawl kasta ama qaado tallaabo kasta oo lagama maarmaan u ah fulinta hawlaha iyo masuuliyadaha uu siinayo xeerkani iyo xeerarka kale ee khuseeya ee dalka.
3. Xarunta dhexe ee komishanku waxa ay noqonysaa magaalo madaxda dalka ee Hargeysa, wuxuuna laamo ku yeelan karaa meelo kale oo ka mid ah gobollada dalka ee guddida komishanku go'aamiso in ay lagama maarmaan u tahay habsami fulinta hawlaha komishanka.

Qodobka 9aad
Shaamabadda Komishanka

1. Komishanku waxa uu yeelan doonaa hal shaambad oo u gaar ah, guddida komishanka ayaana go'aamin doona qaabka, qiyaasta iyo nooca ay noqonayso shaamabadda komishanku.
2. Shaamabadda komishanka waxa hayn doona agaasimaha fulinta komishanka ama cid ka tirsan shaqaalaha komishanka oo uu guddida komishanku u magacaabo hawshan.
3. Dhammaan awaamiirta, baaqyada, hagayaasha, qaraarada iyo go'aannada komishanku waxa ay noqonayaan qoraal, waxayna ku sugmayaan saxeexa guddoomiyaha iyo agaasimaha guud.
4. Shaamabadda komishanka waxa lagu dhufan karaa qoraal, haddii uu qoraalkaasi wato saxeexa guddoomiyaha iyo agaasimaha guud.
5. Qoraal kasta oo ay kutaallo shaamabadda komishanku waxa loo tixgalinayaa caddayn ku dhaqan ah oo sharci leh, haddii aan la caddaynin in aan shaambadaynta qoraalkaasi waafaqsanayn sida uu xeerinayo qodobkani.



Qodobka 10aad

Hawlaha iyo Masuuliyadaha Komishanka

Komishanku waxa uu u xilsaaran yahay nidaaminta korontada, si waafaqsan xeerkan iyo siyaasadaha iyo qorshayaasha tamarta korontada ee wasaaraddu meel mariso. Iyadoo waajibka guud sidaasi yahay, komishanku waxa uu u xilsaaran yahay hawlaha iyo masuuliyadahan soo socda:

1. Dejinta iyo dibu'eegista khidmadahaha iyo khidmada adeegga iyo qalabka Korontada.
2. Bixinta, cusboonaysiinta, waxkabeddelka, hakinta iyo laalista ruqsadaha, kormeerka iyo meelmarinta ku dhaqanka ruqsadaha khuseeya hawlaha tamarta korontada, si waafaqsan xeerkan iyo xeeridaamiyaha khuseeya.
3. Go'aaminta qaabka iyo shuruudaha ruqsadeed ee ruqsadaha, si waafaqsan xeerkan iyo xeeridaamiyaha ruqsadaha.
4. Dejinta iyo cayimidda khidmadaha codsiyada khuseeya ruqsadaha iyo ganaaxyada ku waajiba ruqsadlaha ku xad gudba waajibaadka bixinta khidmadaha ruqsadda.
5. Dabagalka iyo kormeerka hawlgudashada ruqsadlaha iyo xaqijinta in ruqsadlaha u hoggaansamaan shuruudaha ruqsaddahooda, xeerkan, xeeridaamiyaha ka farcama iyo xeerarka kale ee dhaqangalka ah.
6. Xaqijinta in, si waafaqsan xeerkan, ruqsadalaha dhalinta iyo qaybinta Korontadu ugu xidhmaan shabakadda koronto gudbinta Qaranka, si ay u siman yihiin.
7. Inuu iskii ama isagoo ka duulaya cabasho loo soo gudbiyay kormeer iyo baadhis ku sameeyo xarumaha, kaabayaasha tamarta korontada iyo goobaha ay ka socoto hawlaha ruqsadle.
8. Inuu xaqiiyo inuu macmiilku helo adeeg koronto oo laysku halaynkaro bad-qabta, jaban, oo isla markaana leh tayo sare,
9. Inuu xaqiiyo jiritaanka suuq koronto oo xor ah, tartan xalaal ahina ka jiro, isla markaasna aan u xidhnayn cid gaar ah, una simanyihiin ruqsadlaha si waafaqsan mabda'a suuqa ganacsiga ee xorta ah ee ku xusan araarta Dastuurka xarafkeeda "kh".
10. Inuu helo, baadho go'aamana ka gaadho cabashooyinka macaamiisha ee khuseeya:
 - b. Khidmadaha iyo khidmada adeegga tamarta korontada iyo
 - t. Tayada adeegga iyo qalabka tamarta korontada.
11. Xallinta khilaafaadka ka dhexdhaca ruqsadlaha ama dhexmara ruqsadle iyo macaamiil.
12. Inuu ka dalban karo ruqsadlaha inay u soo gudbiyaan warbixinno, macluumaad, xisaab xidho uu hadba uga baahdo gudashada waajibaadkooda si waafaqsan xeerkan.
13. Dabagalka iyo meelmarinta in ruqsadlaha u hoggaansamaan halbeegyada waxqabadka iyo tayada adeegga ee hadba dhaqangalka ah.
14. Dejinta nidaam xisaabeed mid ah oo ay ku dhaqmaan ruqsadlaha.
15. Inuu wasiirka u gudbiyo warbixinta tamarta korontada iyo hawlaha komishanka.
16. Hubinta iyo xaqijinta in ruqsadlaha fuliyaan hawladii ama adeegyadii ruqsadda loo siiyay si waafaqsan ruqsaddahooda.



17. Ilaalinta danaha macaamiisha iyo ruqsadlayaasha .
18. Wacyigelinta iyo kor u qaadidda fahanka dadweynuhu u leeyihiin muhiimadda nidaaminta korontada guud ahaan iyo gaar ahaan:
 - b. Hawlaha, waajibaadyada iyo awoodaha komishanka.
 - t. Xuquuqaha iyo waajibaadyada macaamiisha iyo ruqsadlayaasha.
 - j. Qaabka dadweynaha iyo ruqsadlayaashu cabashooyin u gudbin karaan iyo nidaamka xallinta muranadaas.
19. Fulinta hawlaha kale ee uu xeerkan iyo xilsaarayo iyo hawl kasta oo kale oo la xidhiidha hawlaha uu u xilsaaranyahay.

Qodobka 11aad

Tilmaamaha iyo Awaamiirta Wasiirka

1. Wasiirku waxa uu awood u leeyahay inuu komishanka siiyo awaamiir qoraal ah oo guud ama gaar ah oo ujeeddadoodu tahay fulinta iyo ka midho dhalinta siyaasadaha, qorshayaasha ama istaraatiijiyadaha korontada ee wasaaradda, isla markaana aan ka hor imanaynin xeerkan.
2. Guddida komishanka, waxa waajib ku ah in ay u hoggaansato oo xaqiijiso in Komishanku ku dhaqmay una hogaansamay tilaamaha iyo awaamiirta wasiirku u siiyo si waafaqsan xeerkan iyo xeeridaamiyayaasha ka farcama.

CUTUBKA 4AAD

QAABDHISMEEDKA, MAAMULKA IYO MAALIYADDA KOMISHANKA

Qodobka 12aad

Qaabdhismeedka Maamul ee Komishanka

- 1) Qaabdhismeedka komishanku, waxa uu ka koobnaan doonaa 7 xubnood oo kala ah;
 - b) Gudoomiyaha komishanka, gudoomiye-kuxigeenka komishanka iyo 5 xubnood oo kale oo loo magacaabay si waafaqsan qodobka 13aad ee xeerkan.
 - t) Agaasime Guud iyo
 - j) Waaxaha & shaqaalaha kale ee lagaama maarmaanka u ah xilgudashada komishanka.
- 2) Xubnaha komishanka iyo shaqaalihisuba waxay yeelanayaan mushahar iyo gunno la mid ah komishannada kale ee madaxabannaan ee Qaranka.
- 3) Waxa reebban in xubnaha komishanka iyo shaqaalaheeduba ay si toos ah ama si dadban ay ugu yeeshaan dano maaliyadeed ama dano kale oo gaar ah shirkadaha tamarta korontada.
- 4) Agaasimaha Guud ee komishanka waxa magacaabaya Madaxweynaha , si waafaqsan qodobka 90aad ee Dastuurka, waxaanu ku xulanayaa xirfad aqooneed iyo waayo'aragnimo uu u leeyahay/leedahay mid ka mid ah arrimaha maamulka, dhaqaalaha, maaliyadda, sharciga, maaraynta, deegaanka ama xirfad aqooneed oo la xidhiidha korontada.



Qaybta 1aad **Guddida Komishanka**

Qodobka 13aad **Magacaabidda Guddida Komishanka**

- 1) Gudoomiyaha, gudoomiye-kuxigeenka iyo xubnaha kale ee komishanka waxa magacaabaya Madaxweynaha, waxaana cod hal dheeri ah ku ansixinaya Golaha Wakiillada JSL.
- 2) Guddoomiyaha, guddoomiye-kuxigeenka iyo xubnaha komishanka waxa xilka ka qaadi kara oo kaliya Madaxweynaha.
- 3) Xubnaha komishanka waxa loo magacaabayaa, si waafaqsan qodobka 14 aad xeerkan

Qodobka 14aad **Shuruudaha Magacaabista Xubnaha Komishanka**

Xubinta loo magacaabayoo komishanku waa in ay buuxisaa shuruudahan hoos ku xusan:

1. Waa inuu yahay muwaaddin, kuna dhaqmaa diinta islaamka
2. Waa in aanay da'diisu ka yaraan 30 sanno, kana waynaan isla wakhtiga loo magacaabayoo xubinimada 70 sanno,
3. Waa inuu ugu yaraan haystaa shahaadada koowaad ee jaamacadda oo la'xidhiidha injineeriyadda tamarta korontada (Electrical engineering), sharciga (LLB), dhaqaalaha, maaliyadda, maamulka iyo maaraynta.
4. Waa in ay leedahay waayo'aragnimo ugu yaraan saddex sannadood ah oo la xidhiidha heerka aqooneed ee faqradda sare ee qodobkan lagu sheegay.
5. Waa in aanu wax dambi ah kaga hor caddaan Maxkamadda horteeda saddexdii sanno ee u dambeeyey.
6. Waa in aanay jirin baahi gaar ah (specific needs) ama mid caafimaad oo ka hor istaagaysa gudashada masuuliyadda loo igmaday xubinta komishanka.
7. Waa inuu yahay qof akhlaaq wanaagsan oo xilkas ah.

Qodobka 15aad **Hawlaha iyo Masuuliydaha Guddida Komishanka**

1. Guddidu waa cidda ka masuulka ah hoggaaminta iyo maamulka guud ahaan hawlaha komishanka ee uu dhigayo xeerkan. Iyadoon waxba loo dhimaynin masuuliyaddaas guud, guddidu wuxuu leeyahay hawlahaan iyo awoodahan soo socda:
 - b. Ansixinta qorshe hawleedka iyo barnaamijyada komishanka iyo
 - t. Ansixinta dhammaan arrimaha komishanku u xilsaaran yahay sida:
 - I. Bixinta, cusboonaysiinta, hakinta iyo laalista, ruqsadda iyo oggolaanshaha wareejinta ruqsadaha.
 - II. Diyaarinta iyo u gudbinta wasiirka xeeridaamiyayaasha loogu baahanyahay fulinta xeerkan.
 - III. Ansaxinta khidmadaha iyo khidmadaha adeegga korontada, si waafqsan qodobka 55aad, faqraddiisa afraad xarafka (x) ee xeerkan.



- IV. Ansixinta odoros miisaaniyadeedka iyo qorshe sannadeedka, warbixnaha iyo xisaabxidhada komishanka.
 - V. Ansixinta qaabdhismeedka maamulka iyo shuruudaha iyo siyaasadaha cududda shaqaalaha komishanka iyo
 - j. Magacaabidda guddihoosaadyo, lataliyayaal, kormeerayaal iyo
 - x. Go'aan ka qaadashada arrimaha uu hadba soo hordhigo guddoomiyuhu ee khuseeya hawlaha iyo awoodaha komishanka.
2. Guddoomiyaha komishanka ayaa noqonaya guddoomiyaha guddida, isla markaana isku dubbaridaya maamulka hawlaha guddida.
- Guddoomiyaha guddidu waa isku xidhaha guddida iyo wasaaradda, waxaanu gudanayaa waajibaadyada iyo hawlaha kale ee uu u xilsaarayo xeerkan iyo xeeridaamiyayaasha ka farcama.

Qodobka 16aad

Muddo Xileedka Guddida Komishanka

- 1. Muddo xileedka xubanaha guddidu waa muddo shan (5) sannadood ah oo ka bilaabmayso taariikhda uu magacaabo Madaxweynuhu, waxaana dib loogu magacaabi karaa ugu badnaan hal mar (1) muddo xileed oo kale ah.
- 2. Xubin kasta oo xubanaha guddida ahi waxa uu xilka xubinnimo ee guddida haynayaa inta uu ka dhammaanayo muddo xileedka guddidu haddii, aanu ka hor dhammaadka muddo xileedka guddida u lumin ama u bannayn jagada xubinnimo, si waafqsan faqradda 1aad ee qodobka 17aad ee xeerkan.

Qodobka 17aad.

Bannaanaanshaha Xubinimada Guddida

- 1. Xubinimada guddidu waxay ku bannaanaan kartaa:
 - b) Haddii, uu Iscasilaad qoraal ah u gudbiyo Madaxweynaha, Madaxweynuhuna ka aqbalo.
 - t) Haddii, uu geeriyooda.
 - j) Haddii uu gudan kari waayo xilka sababo caafimaad darro awgeed oo ay caddeeyeen guddi dhakhaatiir ah oo ka diiwaangashan wasaaradda caafimaadka.
 - x) Haddii, uu Madaxweynuhu xilka ka qaado.
 - Kh. Haddii, uu ka maqnaado afar kulan oo xidhiidha oo ah kulannada caadiga ah ee guddida cudur daar la'aan ama fasax la'aan.
 - d) Haddii, uu is-hortaago xilgudashada hawlaha guddida ama uu diido gudashada hawl ay guddidu si waafaqsan xeerkan ugu xilsaartay.
 - r) Haddii, uu xilka xubinimadiisa u adeegsado danaysi gaar ah ama ku tagri falo, si uu cid kale ugu daneeyo ama ugu waxyeelleeyo.
 - s) Haddii uu ku kaco fal ama arrin kale oo anshax xumo ah oo ku cad xeerhoosaadka guddida.
 - sh) Haddii ay xubintu ku kacdo falka lagu sheegay qodobka 12 aad faqradiisa 3 aad ee xeerkan
 - dh) Haddii xubin ay burto mid ama kabadan shuruudaha lagu soo magacaabay ee ku xusan qodobka 14 aad ee xeerkan.



c) Haddii, ay xubintu ku kacdo fal uu xeerkani ama xeerarka kale ee dalku ay u aqoonsanyihiin faldembi.

g) Haddii, ay xubintu ku kacdo fal ka dhan ah Dastuurka JSL.

2. Haddii, ay dhacdo xaaladaha ku xusan faqradda 1aad ee xarfaha (x, kh, d,r,s,sh,dh,c, iyo g) ee qodobkan, Madaxweynaha ayaa xilka ka qaadaya xubinta guddida ka tirsan ee ku sifooba xaaladahaas.

Qoobka 18aad **Kulannada Guddida**

1. Guddidu waxa ay yeelanayaan kulamo caadiya iyo kuwo aan caadi ahayn.
2. Kulamada caadiga ah ee guddidu waxay qabsoomayaan laba jeer bishiiba ama labadii toddobaadba hal mar.
3. Guddoomiyaha ayaa isugu yeedhi doona kulanka caadiga ah ee guddida, waana in guddoomiyuhu uu ugu yaraan 3 cisho ka hor taariikhda kulanka, xubin kasta oo ka mid ah xubnaha guddida gaadhsiiyo ogeysiis qoraal ah oo qeexaya goobta, goorta iyo qodobbada kulanku daarran yahay.
4. Guddidu waxa uu yeelan doonaa kulan aan caadi ahayn, haddii guddoomiyuhu iskii u go'aansado una iclaamiyo kulanka ama ay ugu yaraan 3 xubnood oo xubanaha guddidu codsadaan kulanka, qoraal codsi ahna u gudbiyaan guddoomiyaha.
5. Dhammaan kulamada guddida waxa isugu yeedhaya oo shir guddoomin doona guddoomiyaha ama guddoomiye-kuxigeenka, marka guddoomiyuhu maqan yahay.
6. Kulanka Goluhu waxa uu qabsoomayaa marka ay kulanka soo xaadiraan ugu yaraan shan (5) xubnood oo uu ku jiro guddoomiyuhu ama guddoomiye-kuxigeenku, marka guddoomiyuhu maqan yahay.
7. Go'aannada guddidu waxa ay ku ansaxayaan, cod haldheeri ah (simple majority)
8. Agaasimaha Guud ee komishanka ayaa u xilsaaran inuu xaqiijiyo in si fiican oo la'fahmi karo oo dhammaystiran loo qoro, hadal qoraalka kulan kasta oo guddidu yeelato. Hadal qoraalka kulanka guddidu waa inuu saxeexo guddoomiyaha kulankaasi, kaddib marka agaasimaha guud si dhakhso ah ula wadaago dhammaan xubanaha guddida, si ay u hubiyaan saxnimada iyo dhammaystirnaanta hadal qoraalka kulanka guddida.
9. Ma bannaana in xubin ka mid ah xubanaha guddidu ka qayb galo ama ka codeeyo kulan guddidu ka yeelanayo arrin xubintaas ku saabsan ama dhallinaysa is khilaaf daneed.
10. Guddoomiyuhu, haddii uu u garto lagama maarmaan ama ay ka codsadaan ugu yaraan laba xubnood oo xubana guddida ahi, waxa uu awoodaa in uu cid ku marti qaado inay ka soo qaybgasho kulanka guddida, si uu uga qayb qaato kulanka ugana dhiibto ra'yigiisa, hasayeeshee, ciddaas lagu marti qaaday kulanka xaq uma laha inuu codeeyo.

Qodobka 19aad

Hawlaha iyo Masuuliyadaha Guddoomiyaha iyo Guddoomiye-kuxigeenka Komishanka

1. Hawlaha iyo masuuliyadaha guddoomiyaha ee dhanka maamulka guddida iyo arrimaha maamul ee komishanka.
 - 1.1. Guddoomiyuhu waxa uu u xilsaaran yahay nidaaminta iyo hoggaaminta hawlaha guddida, iyadoo uu xilkan gudanayo, guddoomiyuhu wuxuu leeyahay hawlahaan soo socda:
 - b. Isugu yeedhidda iyo guddoominta dhammaan kulmada guddida.



- t. Dhismaha iyo magacaabidda xubnaha guddihoosaadyada komishanka, kaddib marka uu helo ansixinta guddida.
- j. Shaqaalaynta lataliyayaasha komishanka kaddib marka uu helo ansixinta guddida.
- x. Saxeexidda iyo baahinta habraacyada, halbeegyada. Xeerhoosaadyada, wareegtooyinka iyo awaamiirta kale ee maamul ee uu guddida hoggaamintu u soo saaro, si waafaqsan xeerkan iyo u gudbinta qabyaqoraallada xeernidaamiyayaasha, si guddida komisanku u soo diyaariyo, si waafaqsan xeerkan wasiirkuna si uu u ansaxiyo.
- Kh. fulinta hawlaha kale ee guddida ee uu u xilsaaran yahay ama loogu xilsaaro, si waafaqsan xeerkan.
- 1.2. Guddoomiyuhu wuxuu leeyahay oo u xilsaaran yahay gudashada hawlahaan socda ee khuseeya arrimaha maamulka komishanka:
 - b. Wuxuu matalaa kuna hadlaa afka komishanka.
 - t. Wuxuu kor ka maamula ama korjoogteeyaa hawl gudashada agaasimaha guud.
 - j. Wuxuu saxeexaa dhammaan heshiisyada komishanku lagalaayo cid saddexaad, marka laga reebo heshiisyada shaqaalaha komishanka iyo heshiisyada khuseeya dhaqangelinta miisaaniyadda komishanka.
 - x. Wuxuu sexeexaa oggolaansho kharash galida si uu agaasimaha guud ugu fasaxo gelidda kharashka iyo bixinta lacagaha miisaaniyadda komishanka iyo
 - Kh. Hawlaha iyo waajibaadyada kale ee uu xeerkan ama xeernidaamiye u xilsaaro ama uu u igamado guddida.
- 2. Hawlaha iyo masuuliyadaha guddoomiye-kuxigeenka, guddoomiye-kuxigeenka Komishanku wuxuu u xilsaaran yahay gudashada hawlahaan soo socda:
 - b. Fulinta hawlaha iyo masuuliyadaha guddoomiyaha, marka guddoomiyuhu maqan yahay iyo
 - r. Fulinta ama gudashada hawlaha uu u igmado guddoomiyuhu iyo guddidu ama uu u xilsaaro xeerkani ama xeernidaamiye.

Qodobka 20aad

Guddiyada Gaarka ah ee Komishanka

- 1. Guddida gaarka ah ee uu magacaabo guddoomiyaha komishanku ama guddiyo gaar ah oo uu u xilsaaro in ay soo baadhaan, talana ka soo siiyaan guddida komishanka arrimo ka mid ah hawlaha khuseeya komishanka ama ugu igmado fulinta hawl ka mid ah hawlaha ama awoodaha guddida komishanka.
- 2. Guddida gaarka ah ee ku xusan faqradda 1aad ee qodoabkani waxa ay ka koobnaan doontaa guddoomiye iyo tiro xubno ah oo ka mid ah xubnaha guddida komishanka.
- 3. Iyadoo loo hoggaansamayo awaamiirta ama tilmaamaha uu siiyo guddoomiyaha Komishanku, guddida gaarka ah ee loo magacaabo si waafaqsan qodobkan, waxay yeelan karaan, dejisan karaan xeerhoosaad ay isku maamulaan.
- 4. Guddida gaarka ah ee uu magacaabo guddoomiyaha komishanku wuxuu hawsha ama waajibaadka loo xilsaaray u fulinayaa ama gudanayaa si waafaqsan xeerkan iyo xeerhoosaadyada/hagayaasha komishanka, iyadoo isla markasna tixgalinaysa soo jeedinta guddoomiyaha komishanka.



Qodobka 21aad Lataliyayaal

1. Guddida komishanku wuxuu shaqaalaysan karaa qof lataliye ah oo kala taliya ama ka caawiya gudashada hawlaha komishanka, haddii guddidu ku qanacdo in qof kaasi aqoon xirfadeed iyo waayo'araganimu shaqo oo ku filan uu u leeyahay hawsha ama arrinka komishanku u baahan yahay in laga caawiyo.
2. Qofka lataliyaha ah ee uu guddidu u shaqaalaysato si waafaqsan faqradda 1aad ee qodobakani waxa uu ka qayb gali karaa kulannada guddida ee khuseeya hawsha loo shaqaaleyey, hasayeeshee uma bannaana qofkaasi inuu ka codeeyo kulanka guddida ama inuu ka qaybgalo kulannada kale ee guddida ama ka qayb qaato hawl kale oo Komishanku leeyahay.

Qodobka 22aad Igmashada Hawlaha iyo Awoodaha Komishanka

1. Iyadoo loo hoggaansamayo farqadda 2aad ee qodobakan, guddida komishanku waxay kari kartaa in guddoomiyaha, guddoomiye-kuxigeenka ama xubin ama xubno ka mid ah xubanaha guddida ama sarkaal ama hawl wadeeno ka tirsan shaqaalaha komishanka ama guddi gaar ah oo uu qoraal igmasho ugu igmado ama ugu xilsaaro fulinta ama maamulka hawl ama awoodaha guddida marka laga reebo:
 - a. Ansixinta bixinta, diidmada, waxkabeddelka, cusboonaysiinta, hakinta, laalista, wareejinta ruqsadda iyo cayimidda shuruudaha ruqsadaha.
 - t. Ansaxinta iyo waxkabeddelka khidmadaha iyo
 - j. Dejinta xeernidaamiyayaasha, xeerhoosaadyada iyo awaamiirta komishanka.
2. Cid kasta oo aan ku qancin ama cabasho ka qabta go'aan ama tallaabada uu soo saaro ama qaado cidda ama guddi gaar ah oo loo igmaday ama hawl loogu xilsaaray si waafaqsan qodobakan wuxuu xaq u leeyahay inuu cabasho qoraal ah u soo gudbisto guddida komishanka.

Qodobka 23aad Mushaharka iyo Gunnada Xubnaha Guddida Komishanka

Xubin kasta oo ka mid ah xubnaha guddida komishanka wuxuu xaq u yeelanayaa in la siiyo mushahar iyo gunno la mid ah komishannada la midka ah ee dawladda.

QAYBTA 2AAD

SHAQAALAH KOMISHANKA

Qodobka 24aad Agaasimaha Guud ee Komishanka

1. Komishanku wuxuu yeelanayaa agaasime guud oo ka masuul noqon doona fulinta hawlaha maamul ee komishanka.
2. Agaasimaha Guud ee komishanka waxa si waafaqsan qodobka 90 aad ee Dastuurka iyo qodobkan u magacaabaya Madaxweynaha Qaranka.
3. Cidda loo magacaabayagaasimaha guud waa inuu yahay qof:
 - a. Muwaaddin Somaliland ah, muslin ah, jidh ahaan iyo maskax ahaan fayow, dhawrsoon, aamin ah, sumcad wanaagsanna ku dhex leh bulshada.



- t. Aqoon jaamcadeed iyo waayo'aragnimo shaqo oon kayarayn 7 sannadood u leh midka mid ah arrimaha maamulka dawlaga ama dhaqaalaha ama maareynta maaliyadda dawladda ama sharciga ama maaraynta deegaanka ama injineernimada hawlaha tamarta Korontada.
- 4. Qofna looma magacaabi karo agaasimaha guud, hadii uu:
- b. Yahay saamile ama agaasime ama ka tirsan yahay maamulka ama shaqaalaha ruqsadle ama uu yahay cid xidhiidh ganacsi la leh ama dan maaliyadeed toosa ama dadban ku leh ruqsadle ama adeeg bixiye ama
- t. Yahay qof ay maxkamd awood u lehi ku heshay kuna xukuntay faldembiyeed ku xusan xeerkan ama faldembiyeed la xidhiidha khiyaamo ama daacad darro ama faldembiyeed kale oo uu ku mutaystay xabsi ciqaabeed aan ka yarayn 5 sannadood.

Qodobka 25aad

Hawlaha iyo Masuuliyadaha Agaasimaha Guud

1. Agaasimaha guud ee komishanku waxa uu hoos yimaadaa oo la'xisaabtamayaa guddoomiyaha, waxaanu komishanka uga masuul yahay habsami u socodsiinta shaqada iyo hawlaha maamul ee komishanka, gaar ahaanna wuxuu u xilsaaran yahay hawlahaan iyo masuuliyadahan soo socda:
 - b. Maamulka iyo fulinta dhammaan hawl maalmeedka komishanka
 - t. Kormeerka iyo korjoogtaynta shaqaalaha komishanka.
 - j. Diyaarinta iyo u gudbinta guddida qorshe hawleedka iyo odoros miisaaniyad sannadeedka komishanka.
 - x. Saxeexista kharashaadka iyo lacag bixinaha isaga oo raacaya qoondaynta miisaaniyadda iyo qorshe hawleedka komishanka iyo fulinta dhammaan shaqooyinka iyo hawlaha ama arrimaha kale ee looga baahdo socodsiinta iyo habsami u fulinta hawlgallada komishanka.
 - Kh. Diyaarinta qaabdhismeedka, shuruudaha iyo shaqo qeexidda shaqaalaha Komishanka, isagoo la kaashanaya Hay'adda Shaqaalaha dawladda iyo u gudbintooda guddida, si ay u ansaxiso iyo dhaqangalintooda marka la ansaxiyo
 - d. Xaqiijinta in komishanku shaqaalaysto oo haysto shaqaale khibrad iyo aqoon u leh kuna filan habsami u fulinta hawlaha iyo waajibaadyada komishanka, si waafaqsan xeerka iyo xeerhoosadyada shaqaalaha dawladda.
 - r. Dhaqangelinta. dabbaqidada siyaasadaha, habraacyada, awaamiirta iyo go'aannada guddida ama guddoomiyaha ee waafaqsan xeerkan ama xeeridaamiye.
 - s. Hawlaha iyo waajibaadyada kale ee uu siiyo ama saaro xeerkani ama xeeridaamiye ama xeer kale oo dhaqangal ah ama guddidu u xilsaarto.
2. Ka sokow xilka iyo masuuliyadda fulineed ee uu dhigayo farqadda 1aad ee qodobkan, agaasimaha guud ee komishanku waxa uu noqonayaa xoghayaha guddida komishanka, waxaanu u xilsaaran yahay hawlahaan soo socda:
 - b. Diyaarinta ogeysiisyada iyo qabsoomidda kulannada guddida iyo gaadhsiintooda xubnaha guddida, marka uu ku amro guddoomiyuhu.
 - t. Qorista hadal qoraallada shiraraka guddida.
 - j. Haynta, ilaalinta iyo xafididda hadal qoraallada kulannada, diiwaanada iyo qoraallada kale ee guddida



- x. Haynta shaambadda komishanka iyo shaambadaynta go'aamada, qoraallada iyo dhukumentiyada ka soo baxa guddida.

Qodobka 26aad

Iscasilaadda iyo Xil kaqaadista Agaasimaha Guud

Jagada Agaasimaha Guud way bannaanaysaa, haddii:

1. Uu Iskii isu casilo oo uu qoraal ogaysiis 60 cisho ahna u gudbiyo Madaxweynaha ama
 2. Uu kaddib soo jeedinta wasiirka, Madaxweynuhu xilka uga qaado sababahan soo socda midkood:
 - b.. Caafimaad darro awgeed tahli waayo gudashada xilkiisa, muddo ka badan saddex bilood oo xidhiidh ah ama
 - t. Dhaqan xumo lid ku ah shareecada Islaamka, taas oo ku keenaysa hay'adda iyo dalkaba sumcad xumo ama
 - j.. Xil gudasho la'aan uu ku guuldarraysto fulinta waajibaadkii loo igmaday, iyada oo la siiyay fursado uu ku saxo wixii ka qaldamay ama
 - x. Maxkamad awood u lehi ku xukunto faldambiyeed la'xidhiidha xatooyo, musuqmaasuq, been abuur iyo fal kasta oo keensanaya aamin xumo ama faldambiyeed kale oo uu ku mutaystay xadhig ciqaabeed ka badan lix bilood ama
 - kh. Kutagrifal awooddiisa xafiis ama hantida iyo maaliyadda komishanka ama
 - d. Ku lugyeelasho iskhilaaf daneed (conflict of interest)
3. Haddii jagada agaasimaha guud u bannaanato, waxa la magacaabi doonaa agaasime guud oo cusub, iyada oo loo raacayo qodobka 24aad ee xeerkan.

Qodobka 27aad

Shaqaalaha kale ee Komishanka

1. Komishanku waxa uu yeelanayaa shaqaale aqoon xirfadeed iyo waayo'aragnimo ku filan u leh hawlaha iyo gudashada waajibaadyada komishanka, kuwaas oo loo shaqaaleyn doono si waafaqsan xeerka iyo xeernidamiyayaasha shaqaalaha dawladda.
2. Mushaharka, gunnooyinka iyo xuquuqaha shaqaalinimo ee shaqaalaha waxa go'aamin doona si waafaqsan xeerka iyo xeernidaamiyaha shaqaalaha dawladda.

Qodobka 28aad

Iskhilaafka danaha

1. Waxa ka reebban xubnaha guddida komishanka, agaasimaha guud iyo mid kasta oo ka tirsan shaqaalaha komishanka in inta uu xilka hayo uu noqdo cid:
 - b. Saami ama dan maaliyadeed si toos ah ama si dadban ugu leh ama
 - t. Gacanta ku haysa ama maamusha ama hawlgalisa ama shaqaale u ah adeegbixiye ama ruqsadle ka hawgala ama ka ganacsada gudaha dalka Somaliland.
2. Qof kasta oo ka mid ah kuwa ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waxa ka reeban in uu ku lug yeesho ama ka qayb qaato go'aaminta hawl ama arrin la horkeenay ama uu ku lug leeyahay komishanku oo dhalinaysa iskhilaaf daneed.
3. Qof kasta oo ka mid ah kuwa ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan ee ogaada jiritaanka arrin la horkeenay ama la horkeeni doono xafiiskiisa ama guddi uu xubin ka yahay oo



dhalinaysa iskhilaaf daneed, waxa ku waajib ah in uu xubnaha kale ee guddida ama maamulka ka sarreeya u sheego jiritaanka iskhilaafkaasi daneed, waana in uu islamarka uu ogaadaba joogsado ama aanu ka qayb qaadanin go'aaminta arrinkaas.

4. Qofka isagoo og ama ay ahayd inuu ogaado hawl ama arrin dhallinaysa iskhilaaf daneed ee ku lug yeesha ama ka qayb gala go'aaminta hawshaasi ama arrinkaasi waxa uu mutaysanayaa in xubinnimada laga qaado ama xilka laga xayuubiyo ama shaqada laga eryo, hadba ka ay tahay.

QAYBTA 3AAD

MAALIYADDA IYO XISAABAADKA KOMISHANKA

Qodobka 29aad

Ilaha Maaliyadda Komishanka

1. Komishanku waxa uu hawlihiisa ku fulinyaa dakhliga uu ka helo ilahan maaliyadeed ee soo socda :
 - b. Qoondada sannad walba miisaaniyadda qaranka loogu qoondeeyo.
 - t. Deeqaha cidi ugu deeqdo Komishanka.
 - j. Deymaha K=komishanku u qaato si waafaqsan xeerkan iyo Xeerka Maamulka Maaliyadda Dawladda.
2. Dhammaan lacagaha ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waxa lagu shubayaa Khasnada Qaranka ee Bangiga Dhexe ee Somaliland waxaana lagu soo darayaa Miisaaniyada Qaranka.
3. Komishanku waxa uu u qaadan karaa deeq ama amaah si waafaqsan Xeerka Maamulka iyo Maaliyadda Dawladda.

Qodobka 30aad

Qorshe hawleedka iyo Miisaaniyad Sannadeedka Komishanka

1. Agaasimaha Fulintu wuxuu si wafaqsan Xeerka Maamulka iyo Maaliyadda 90 cisho ka hor dhammaadka sannad miisaaniyadeed kasta uu diyarinayaa qorshe hawleedka iyo odoros miisaaniyad sannadeedka komishanka , isla markaana u gudbin doonaa guddida komishanka, si ay uga doodaan una ansixiyaan.
2. Kaddib marka uu guddidu ansaxiso, guddoomiyaha komishanku wuxuu qorshaha iyo odoros miisaaniyadeedka u gudbin doonaa wasiirka maaliyadda isagoo wasiirka tamarta iyo macdanta siinaaya nuqul ogaysiin ah. . .
3. Odoros miisaaniyad sannadeedka ee loo gudbinayo si waafaqsan faqradda 1aad ee qodobkan waxay ka koobnaan doontaa :
 - b. Odoroska dakhli miisaaniyadeedka komishanka ee sannadka dambe iyo ilo dakhliyadeedyada kala duwan ee uu ka imanyo dakhligaasi.
 - t. Odoroska kharashka hawl-fulinta komishanka ee sannad miisaaniyadeedka dambe
 - j. Odoroska kharash mashaariiceedka ee sannad miisaaniyadeedka sannadka dambe iyo
 - x. Waxyaabaha kale ee guddida komishanka, isagoo ka duulaya miisaaniyadda iyo qorshaha komishanku u'arke in ay habboon tahay in odoros miisaaniyadeedka lagu daro.



Qodobka 31aad

Isticmaalka miisaaniyadda iyo Kharashaadka Komishanka

1. Dhammaan dakhliga komishanka ee ku xusan qodobka 29aad ee kore waxa loo isticmaalayaa bixinta kharashaadka fulinta hawlaha iyo waajibaadyada komishanka ee kala ah:
 - b. Arrimaha maamulka iyo dayactir ee komishanka.
 - t. Baahinta iyo kobcinta hawl-qabadka komishanka.
 - j. Bixinta mushaharka, gunnooyinka iyo kharashaadka ku baxa hawlaha guddida.
 - x. Bixinta mushaharaadka iyo gunnooyinka shaqaalaha komishanka.
 - kh. Bixinta kharashaadka hawlaha muhiimka ah ee soo kordha.
 - d. Kharashaadka fulinta hawl-maalmeedka komishanka iyo
 - r. Hawlaha kale uu ku jira qorshe hawleedka iyo qoondaynta miisaaniyadda Komishanka.
2. Agaasimaha Guud ayaa ah sarkaalka xisaabta ee awoodda u leh gelidda iyo bixinta kharashaadka hasayeehsee, agaasimaha fulintu ma gali karo mana bixin karo wax kharash ah, ilaa uu oggolaansho kharash gelid ka haysto guddoomiyaha komishanka, kharashkaasina yahay kharash ku jira qoondayn miisaaniyad sanadeedka komishanka.
3. Agaasimaha fulintu waxa uu xaqiijinayaa in komishanku yeesho, ilaaliyo oo keydiyo buug iyo diiwaanno xisaabeedyo waafaqsan nidaamka uu xisaabiyaha guud iyo xeeridamiyayaasha maaliyadda iyo xisaabaadka dawladda.
4. Hantidhawraha Guud ayaa baadhi doona xisaabaadka iyo maaliyadda komishanka, si waafaqsan Xeerarka Maamulka Maaliyadda dawladda iyo Xeerka Hantidhawrka Guud ee Qaranka.

Qodobka 32aad

Warbixin Sannadeedka Komishanka

1. Agaasimaha Fulintu wuxuu muddo 90 casho gudahood ah oo ka bilaabanta dhammaadka sannad miisaaniyadeed kasta, ku diyaarin doonaa xisaab xidhka sannad miisaaniyadeedka iyo warbixinta waxqabadka sannadka ee komishanka waxaanu u gudbin doonaa guddida komishanka, si ay u ansixiso oo iyaguna ugu sii gudbiyaan wasiirka, xisaabiyaha guud iyo hantidhawraha guud .
2. Warbixinta ku xusan faqradda 1aad ee kore waxa loo diyaarin doonaa si waafaqsan qaabka iyo hannaanka uu xisaabiyaha guud ee Qaranku u dejiyo.
3. Iyadoon wax loo dhimaynin faqradda 2aad ee qodobkan, warbixinta hawlqabad ee komishanku waa inay si cad u tibiaaxdo waxyaabaha uga qabsoomay iyo guulaha uu gaadhay fulinta qorshe hawleedkii komishanka ee sannad miisaaniyadeedkaas warbixintu khusayso.
4. Komishanku wuxuu baahinayaa una suurtagalinayaa in dadweynuhu helaan warbixinaha hawlqabad ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan.



CUTUBKA 5AAD RUQSADAHA

Qodobka 33aad

Waajibnimada Ruqsad Haysasho

1. Qofna ama shirkadina ma dhalin karto, gudbin karto, qaybin karto koronto, mana geli karto, kama ganacsan karto hawl khusaysa dhallinta, gudbinta, qaybinta iyo iibinta adeegga korontada ama soo dejinta ama dhoofinta korontada haddii, aanu haysan ruqsad uu guddida komishanku u siiyay si waafaqsan xeerkan ama aanu ahayn cid laga dhaafay waajibaadka ruqsad qaadasho, si waafaqsan faqradda 1aad ee qodobka 34ad ee xeerkan.
2. Qof kasta oon ahayn cidda laga dhaafay sida uu dhigayo qodobka 34aad ee xeerkan ee isagoon haysan ruqsad gala ama ka ganacsada hawlaha ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waxa uu galay dembi, marka lagu xukumana wuxuu mutaysan doona ciqaab noqon karta ganaax lacageed aan ka yarayn 10 milyan oo shillin ama xabsi u dhaxeeya 1 sanno ilaa 3 sannadood, ka sakow ciqaabtaasna waxa ciddaas lagu xukumayaa in ay joojiso hawsha ay gashay ruqsad la'aanta.

Qodobka 34aad

Hawlaha Korontada ee Ruqsadda laga dhaafay

1. Ruqsad loogama baahna koronto dhalinta ujeeddadeedu tahay in cidda dhalinaysaa isticmaasho, haddii awoodda korontada la dhalinayaa aanay kabadnayn 500 oo kiiloo waat, haseyasho, ka dhaafidda waajibka ruqsad qaadasho ee ku xusan, kama hor istaagayso kamana reebeyso komishanka uu cidda laga dhaafay ruqsadda ku xidho shuruudo ama waajibaadyo u hadba guddida komishanku u arko in ay ku haboon tahay.
2. Waa laga dhaafayaa codsashada iyo qaadashada ruqsadda uu waajibinayo qodobka 33aad ee kore cidda doonaysa:
 - b. Inay meel miyi ah ka dhaliso koronto, haddii xaddiga awoodda koronto ee la dhalinayaa ka yar tahay 500 oo kiiloo waat iyo
 - t. Cidda meel miyi ah ka hirgalinaysaa nidaam qaybin iyo iibin koronto oo ka madaxbannaan shabakadda gudbinta korontada Qaranka, haddii xaddiga awoodda koronto ee nidaamkaasi koronto qaybineed ka yar yahay 500 oo kiiloo waat.
3. Komishanku wuxuu cidda laga dhaafayo qaadashada ruqsadda ee ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan siinayaa qoraal muujinaya in ruqsadda laga dhaafay, shuruudaha iyo waajibaadyada ku xidhan ee ay jebintoodu keeni karto in lagala noqdo si waafaqsan xeernidaamiye gaar ah oo uu wasiirku u soo saaro si uu u dhiirrigaliyo koronto galinta miyiga si waafaqsan qodobka 76aad ee xeerkan.
4. Cidda laga dhaafay qaadashada ruqsadda sida ku xusan qodobkani waxay si waafaqsan qaabka uu dhigo xeernidaamiye loo soo saaro si waafaqsan qodobka 76aad ee xeerkan komishanka ugu gudbin doonaa warbixinaha khuseeya hawsheeda koronto.



Qodobka 35aad

Codsiga iyo Nidaamka Bixinta Ruqsadaha

1. Codsiga Ruqsadaha uu waajibinayo qodobka 33aad (1) ee xeerkani waxa loo gudbinayaa guddida komishanka si waafaqsan faqradda 3aad ee qodobkan.
2. Codsadaha ruqsadda ku xusan faqradda 1aad waxa ku waajib ah in uu bixiyo khidmadda codsiga ruqsadda oon celis lahayn ee ku waajibta ruqsadda uu codsanayo.
3. Codsiga ruqsadda ee loo gudbinayo guddida komishanka, waa inuu yahay qoraal waafqsan qaabka codsiga ruqsadaha ee uu dhigo xeeridaamiyaha ruqsaduhu, isla markaana :
 - b. si cad oo la fahmi karo u tibaaxayo, arrimahan soo socda:
 - i. Magaca iyo faahfaahinta codsadaha (sida ciwaanka, shakhsiyadda iyo xaaladaha qaanuuni),
 - ii. Magacyada iyo faahfaahinaha mulkiilayaasha ama saamiileyda iyo agaasimayaasha ama maareeyaha codsadaha.
 - iii. Nooca iyo muddada ruqsadda la codsanayo.
 - iv. Goobta ama goobaha laga fulinayo mashruuca koronto ee ruqsadda loo codsanayo iyo
 - v. Macluumaadka kale ee uu dhigo xeeridaamiyaha ruqsaduhu.
 - t. laguna soo lifaaqo qoraallada ama dhukumentiyada uu dhigo xeeridaamiyaha ruqsaduhu in lagu soo lifaaqo codsiga.
4. Way bannaan tahay in codsade, codsado ruqsad koronto dhalin iyo ruqsad koronto qaybin, hasayeeshee, waxa shardi ah inuu guddida u gidbiyo laba codsi oo kala gaar ah.
5. Guddidu marka uu ku qanco in codsiga loo soo gudbiyay dhammaystiran yahay, waa in uu la socod siiyo codsadaha, oo muddo 30 maalmood gudahood ahna ku gaadhaa go'aan uu ku aqbalaayo ama ku diidayo codsiga ruqsadda.
6. Haddii uu diido codsiga, guddida komishanku wuxuu, muddo 15 cisho gudahood ah oo ka bilaabmayso taariikhda uu go'aanka diidmada ah gaadhay, qoraal codsadaha ku siin doonaa go'aanka diidmada ah oo sababaysan haddii, uu ku qanci waayo go'aanka diidmada ee guddida, codsaduhu waxa uu xaq u leeyahay in uu muddo 30 cisho gudahood ah oo ka bilaabanta taariikhda uu helay go'aanka maamul ee diidmada ah uu codsi cabasho ah oo ga'aanka maamul ee guddida komishanka soo saaro u gudbinayaa wasiirka, si waafaqsan qodobka 93aad ee xeerkan.

Qodobka 36aad

Amuuraha Gundhigga u ah Aqbalidda iyo Diidmada Codsiga Ruqsadda

Marka uu ka go'aan gaadhayo inuu aqbalo ama u diido bixinta ruqsadda looga soo codsaday si waafaqsan qodobka 35aad (7) ee xeerkan, guddida komishanku wuxuu tixgalin doonaa kuna salayn doonaa go'aankiisa, amuurahan soo socda:

1. Waafaqsanaanta siyaasadaha korontada iyo qorshayaasha iyo barnaamijyada baahinta korontada.
2. Saamaynta uu mashruuca ruqsadda la codsanayo ku yeelan karo habdhaqanka iyo arrimaha bulshada.



3. Gudashada masuuliyadda ilaalinta iyo dhawrista deegaanka si waafaqsan Xeerka Maareynta Deegaanka.
4. Isticmaalka dhulka mashruuca laga fulinayo.
5. Faa'iidada dhaqaale iyo maaliyadeed ee mashruucu u keeni karo waddanka ama deegaanka laga fulinayo.
6. Waxtarka mashruucu u yeelan karo wax ku oolnimada iyo helidda korontada.
7. In aanu saamayn taban ku yeelan xuquuqaha iyo waajibaadyada heshiisyada iyo mudnaanaha ruqsadlayaasha hore ama cid kale.
8. Awoodda farsamo iyo maaliyadeed ee codsadhaha.
9. Shahaadada raadreebka fayoobidda iyo bedqabka deegaanka iyo bulshada ee ay bixiso wasaaradda u xilsaaran deegaanka.
10. Saamaynta uu ku yeelanayo tartanka iyo suuqa tamarta iyo
11. Arrimaha kale ee danta guud ku jirto ama khuseeya amniga Qaranka ee uu dhigo xeeridaamiyaha ruqsaduhu.

Qodobka 37aad

Qaabka iyo Shuruudaha Ruqsadda

Ruqsad kasta oo uu komishanku u bixiyo si'waafqsan xeerkan iyo xeeridaamiyaha ruqsaddu, waxa ay noqon doontaa qoraal iyo qaabka uu go'aamiyo guddida komishanku oo si cad u tibiaxaya shuruudaha ruqsadda ee soo socda:

1. Magaca ruqsad leh
2. Muddada ruqsadda
3. Hawsha ruqsadda loo siiyay
4. Nidaamka dejinta khidmadaha iyo khidmadaha
5. U hoggaansanaanta waajibaadka ka saaran in uu si waafqsan qaabka uu u dejiyo Komishanku u diyaariyo warbixinaha hawlaha ruqsadlaha.
6. Goobta iyo xuduud dhuleedka loo oggolaaday ruqsalaha inuu ka fuliyo hawsha ruqsadda loo siiyay.
7. U hoggaansanaanta iyo ku dhaqanka nidaamka iyo xeeridaamiyaha khidmadaha
8. U hoggaansanaanta iyo ku dhaqanka halbeegyada tayada adeegga iyo qalabka korontada ee uu dhigo xeeridaamiye.
9. In hawlaha kala duwan ee loo haysto ruqsado kala duwan ay mid kastaaba gaar keed u yeelato xisaab gaar ah.
10. Fulinta daraasadda raadreebka deegaanka, bulshada iyo qaadashada shahaadada qiimaynta raadreebka deegaanka iyo bulshada ee wasaaradda deegaanka ka masuulka ah.
11. Ku dhaqanka ama u hoggaansamida xeerarka iyo xeeridaamiyayaasha khuseeya shaqaalaha, bedqabka, deegaanka iyo caafimaadka bulshada.
12. Ururinta xogaha, maclumaadka, diyaarinta iyo u gubinta warbixinaha khuseeya hawlaha ruqsadda ee uu uga baahdo komishanku xeerkan ama xeer kale waajibiyo.
13. Waajibaadka ruqsadlaha ee dhawrista iyo u hoggaansanaanta hagayaasha iyo habraacyada tartanka xorta iyo xalaasha ah, mabaadii'da daahfurnaanta ganacsiga iyo u sinnaanta fursadaha.
14. Reebannaanta waxkabeddel ama wareejin ruqsadeed aanu oggolaanin guddidu.



15. U hogxaansnaanta iyo ku dhaqanka Xeerkan iyo xeeridaamiyayasha ka farcama, iyo xeerarka kale ee khuseeya iyo
16. Amuuraha kale ee uu sheego xeeridaamiye ama komishanku ku dhigo ruqsadda.

Qodobka 38aad

Muddada Ruqsadda iyo Cusboonaysiinta Muddada ruqsadda

1. Muddada ruqsadda loo bixinaayo si waafaqsan xeerkan waxay noqonaysaa ugu badnaanna labaatan (20) sannadood.
2. Si waafaqsan qodobbada xeerkan ruqsadda faqradda sare ee qodobkan lagu sheegay waxaa loo cusboonaysiinayaa si sannadle ah, iyadoo loo eegaayo shuruudaha dib u cusboonaysiinta ruqsadda ee xeerka.
3. Muddada ruqsadda komishanku siiyo ruqsadle waxay noqonaysaa hadba muddada uu u cayimo guddida komishanku ee ku qoran ruqsadda.
4. Go'aaminta muddada ruqsadda waxa lagu salaynayaa muddada lagama maarmaanka u ah in codsaduho dib u heli karo raasamaalka mashruuca koronto iyo macaash macquul ah, si waafaqsan shuruudaha iyo habraaca uu dhigayo xeeridaamiyaha ruqsadda.
5. Iyadoo loo hoggaansamayo faqradda 3aad ee qodobkan, muddada ruqsadda Komishanku u bixiyo si wafaqsan Xeerkan waa hadba muddada ku qoran Ruqsadda ee uu guddidu u cayimo, dhaqangalnimda ruqsadaasina waxa uu ku eeg yahay taariikhda u dambaysa ee muddada ruqsadda ee ku cad ruqsadaasi.
6. Kaddib dhammaadka sannad kasta, ruqsadle kasta waxa ku wajib ah inuu si wafaqsan qaabka uu u dhigo xeeridaamiyaha ruqsaduho ugu soo gudbiyo guddida komishanka codsi oggolaansho sii wadidda hawsha ruqsadda uu u haysto.
7. Guddida Komishanku kaddib marka uu helo codsiga ku xusan faqradda 5aad ee kore ee uu hubiyo in ruqsadlaha u hoggaansamay shuruudihii ruqsadda oo uu sidoo kalana bixiyay khidmadda codsiga iyo dhammaan cashuuraha iyo takaliifta dawladda ee bixintoodu ku waajibay wuxuu siin doonaa ruqsadlahaas shahaado uu ugu oggolaanayo sii wadashada hawsha ruqsadda..
8. Way bannaan tahay in la cusboonaysiiyo ruqsadda muddadeedu dhammaato hasayeeshee, muddada ruqsadda la cusboonaysiinayaa kama badan karto toban (10) sannadood.
9. Ruqsadlaha doonaya in loo cusboonaysiiyo ruqsadda waa inuu hal sanno ka hor dhammaadka muddada ruqsadda codsi cusboonaysiin ruqsadeed u soo gudbiyo guddida komishanka, isla markaana bixiyo khidmadda codsiga dib u cusboonaysiinta ruqsadda oon celis lahayn, guddiduna waxay oggolaan kartaa ama diidi kartaa codsiga cusboonaysiinta ruqsadda si waafaqsan xeeridaamiyaha ruqsaddaha.
10. Cidda ay ka dhacdo ruqsaddu ee iyadoon loo cusboonaysiin sii wadda fulinta hawsha ruqsadda waqtigeedu dhacay waxa uu galay dembi, marka lagu xukumana waxa uu ku mutaysan doonaa ciqaab noqon karta 100 milyan oo shillin ama xabsi aan ka yarayn 3 sannadood kana badnayn 5 sannadood ama labadaba haddii, ciddaasi iska indho tirtay amar komishanku ku amray in ay ku cusboonaysiiso ruqsadda.



Qodobka 39aad
Wareejinta Ruqsadda.

1. Ruqsadda loo bixiyo si waafaqsan xeerkan waxa lahaanaya oo isticmaali kara ruqsadlaha la siiyay oo qudha, ruqsadluhuna waxa uu ku wareejin karaa ruqsaddiisa qaab dhaxal ah ama qaab wareejin ruqsadeed, kaddib markuu helo ansaxinta guddida komishanka.
2. Ulajeedka qodobkan wareejin ruqsadeed waxa ay jirtaa marka ruqsadda ay cid kale kula wareegto qaab iib toos ama dadban, siismo ah, amaanno ah ama kiro ah; ama cid kale la wareegto hoggaaminta maamulka meheradda ama shirkadda ama kaabayaasha addeega korontada ama fulinta hawlaha adeegga koronto ee ruqsadlaha.
3. Ku xadgubka qodobkan waxa ka dhalan kara in la hakiyo ama lala noqdo ruqsadda iyo in cidda ku kacday xadgudubka loo saaro ciqaab, si waafaqsan xeerkan.

Qodobka 40aad
Waxkabeddelka Ruqsadda

Waxkabeddel ruqsadeed waxa loo samayn karaa haddii uu codsado ruqsadle ama guddida komishanka laftiisu uu u arko lagama maarmaan in waxkabeddel lagu sameeyo ruqsadda.

Qodobka 41aad.
Waxkabeddelka Ruqsadda ku timaad soo jeedinta Komishanka .

1. Komishanku waxa uu karaa in uu waxkabeddel ku sameeyo hawlaha iyo shuruudaha ruqsadda, haddii uu ku qanco in waxkabeddelka ruqsadeed loogu baahan yahay oo ay danta guudna ku jirto, sababahan soo socda midkood:
 - b. Waxkabeddel iyo kaabis lagu sameeyay xeerka ama xeernidaamiyayaasha khuseeya ama dib u qaabayn lagu sameeyey qaabdhismeedka suuqa adeegga korontada.
 - t. Ruqsadlaha oo sababo awooddiisa ka baxsan daraadood u awoodi kari waaya in uu fuliyo qaar ka mid ah hawlaha ruqsadda loo siiyay.
 - j. Isbeddel ku dhacay lahaanshiyaha ama xaaladaha sharci ee ruqsadlaha.
 - x. Ruqsadlaha oo si weyn ugu guuldarraysta inuu u hoggaansamo shuruudaha ruqsadda ama go'aamo ama awaamiir kale oo sharciyan khuseeya.
2. Ka hor inta uuna wax ka beddelin ruqsadda, komishanku waxa uu ruqsadlaha u ku wargalinayaa soo jeedinta waxkabeddelka ruqsadda, isaga oo gaadhsinaya qoraal tibaaxaya:
 - b. Go'aanka komishanku ku gaadhay in waxkabeddel ku sameeyo ruqsadda iyo amuuraha ruqsadda ee uu waxkabeddelka ruqsaddu ku saabsan yahay.
 - t. Asbaabaha salka u ah waxkabeddelka ruqsadda iyo sababaha ay lagama maarmaanka u tahay in la fuliyo waxkabeddelka ruqsadda.
 - j. Muddo cayiman oo aan ka yarayn 45 cisho oo ka bilaabanta taariikhda ruqsadluhu helo qoraalkan oo uu xaq u leeyahay in ruqsadluhu komishanka qoraal ugu soo gudbiyo is-hortaag ama diidmo uu ku hor istaagayo ama diidan yahay soo jeedinta/damaca komishanka ee waxkabeddelka ruqsadda.
 - x. Arrimaha kale ee uu dhigo xeernidaamiye.
3. Kaddib marka u helo is-hortaagga ama diidmada ku xusan faqradda 2aad komishanku waxa uu gaadhi doonaa go'aan noqodka in:
 - b. Uu fuliyo waxkabeddelka ruqsadda ee uu ku talagalay
 - t. In kaabis uu ku sameeyo waxkabeddelkii uu damacasanaa.



j. Ka laabto waxkabeddelka uu damacsanaa.

4. Haddii uu ku qanci waayo go'aanka guddida komishanka, ruqsadluhu waxa uu xaq u leeyahay in, kaddib marka uu helo go'aanka maamul ee guddida komishanka uu muddo 30 cisho gudahood ah cabasho ugu gudbiyo wasiirka, si waafaqsan qodobka 81aad ee xeerkan.

Qodobka 42aad.

Waxkabeddelka Ruqsadeed ee uu codsado Ruqsadluhu .

1. Ruqsadlaha doonaya waxkabeddel ruqsadeed, waxa uu guddida komishanka u gudbin doonaa codsi waxkabeddel ruqsadeed, si waafaqsan qaabka iyo shardiyaada codsiga waxkabeddalka ruqsadda ee uu u dhigo xeerndaamiyaha khuseeyaa, waxaanu bixin doonaa khidmadda codsiga waxkabeddel ruqsadeed ee ku waajiba.
2. Guddida Komishanku wuxuu muddo 30 casho gudahood ah oo ka bilaabanta taariikhda uu helay codsiga waxkabeddelka ruqsadda, ku diidi ama aqbali doonaa codsiga waxkabeddelka ruqsadda; isagoo go'aankiisa aqbalka ama diidmada codsigaas ku salaynaya asbaabaha waxkabeddalka ruqsadda ee uu qeexo xeerndaamiyaha ruqsaduhu .

Qodobka 43aad

Hakinta iyo Laalidda Ruqsadda.

1. Komishanku wuxuu awood u leeyahay in uu si waafaqsan qodobkan u hakiyo ama u laallo ruqsad, haddii:
 - b. Ruqsadluhu aanu muddada ku cad ruqsadda ama muuddo dheerayn la siiyay gudaheeda ku bilaabi waayo hirgalinta hawsha ama bixinta adeegga ruqsadda loo siiyay.
 - t. Komishanku ku qanco in ruqsadluhu uu hawsha ruqsadda loo siiyay u fulinayo si aan waafaqsanayn ama xadgudub ku ah shuruudaha ruqsadda ama qodobbada xeerkan.
 - j. Ruqsadluhu caadaysto ku xadgudubka shuruudaha ruqsadda ama xeerkan ama
 - x. Ruqsadluhu musalafo oo ay maxkamadi ku xukunto musalafnimo.
2. Ka hor hakinta ama laalidda ruqsadda, guddida komishanku wuxuu siin doonaa ruqsadlaha, ogaysiin qoraal ah oo si cad u tibaaxaya:
 - b. Shuruudda ama shuruudaha ruqsadda ama waajibaadyada xeerka ee lagu xadgudbay iyo faahfaahinta asbaabta iyo goorta ama xilliga uu dhacay ama la' ogaaday jiritaanka asbaabta ama asbaabaha xadgudub ee komishanku aaminsan yahay in uu galay ruqsadluhu.
 - t. Tallaabooyinka sixitaan ee ay tahay in ruqsadluhu qaado si uu u saxo xadgubayada kor ku xusan iyo
 - j. Amar lagu farayo ruqsadlaha inuu muddo cayiman gudaheed ku fuliyo tallabooyinka sixitaan ee kor ku xusan, warbixinna ugaga soo gudbiyo komishanka.
3. Haddii ruqsadluhu ku guuldarraysto fulinta tallabooyinka sixitaan ee lagu faray si waafaqsan xarafka (t) ee faqradda 2aad ee qodobkan, guddida komishanku waxa uu ruqsadlaha ku wargalin doonaa in uu muddo 10 cisho gudahood ah ugu soo gudbiyo qoraal sababaha uu u fulin waayay tallabooyinka sixitaan ee la faray.



4. Guddida komishanku wuxuu qiimayn doonaa muddo 30 cisho gudahood ahna kaga go'aan gaadhi doonaa sababaha qoraalka ah ee ruqsadluhu ugu soo gudbiyo si waafaqsan faqradda 3aad ee qodobkan, haddii uu ku qanco in ayna jirin sabab maangal ah oo ka hor istaagay ruqsadlaha fulinta tallaabooyinka sixitaan ee ku xusan farqadda 2aad, guddida komishanku, wuxuu :
 - b. Hakinkaraa ruqsadda muddo aan ka yarayn lix bilood kana badnayn 12 bilood, ama
 - t. laali ruqsadda,.
5. Iyadoo hakinta ama laalista ruqsaddu ay halkeeda tahay, guddida komishanku wuxuu ruqsadlaha ku xadgudbay shuruudaha ruqsadda ama xeerkan saari doonaa kana qaadayaa ganaaxa uu mutaysto ee uu dhigo xeerndaamiyaha ruqsaduhu, kasakow ciqaabahaas, ruqsadlaha ku xadgudbay khidmadaha iyo qiimaha adeegga korontada ee loo dejiyay si waafaqsan xeerkan, waxa ku waajib ah inuu macaamiisha u celiyo lacagahii dheeraadka ahaa ee uu ka qaaday .
6. Nidaamka hakinta ama laalidda ruqsadda iyo maaraynta natiijada hakinta ama laalidda ruqsadda waxa loo raaci doonaa xeerndaamiyaha khuseeya.

Qodobka 44aad **Diiwaannada iyo Warbixnaha**

1. Ruqsadle kasta waxa ku waajib ah inuu diyaariyo oo xafido diiwaannada iyo warbixinaha khuseeya fulinta hawsha ruqsadda loo siiyay:
2. Komishanku waxa uu diyaarin doonaa xeerndaamiye qeexi doona qaabka iyo tasmada diiwaannada iyo warbixinaha uu waajibinayo faqradda 1aad ee qodobkani;
3. Ruqsadluhu, marka uu komishanku ka dalbado, wuxuu si degdeg ah iyo muddada uu komishanku u cayimo gudaheeda ugu gudbinayaa komishanka dhammaan macluumaadka ku saabsan hawlgaalada ruqsadlaha ee dhinacyada farsamada, maaliyadda (xisaabaadka), arrimaha shaqaalaha, fayadhawrka, deegaanka iyo macluumaad kasta oo kale oo khuseeya fulinta hawsha ruqsadlaha.
4. Ruqsadlaha waxa ku waajib ah inuu diyaariyo oo uu xafido buugta iyo diiwaannada xisaabta oo waafaqsan qaabka uu u dejiyo komishanku.
5. Ruqsadlaha waxa ku waajib ah inuu xaqiijiyo inuu sannad walba hantidhawre madaxbannaan baadho oo hantidhawro sannad xisaabeedkiisa oo saddex bilood gudahood kaddib dhammaadka sannad maaliyadeed walbana warbixinta hantidhawraha madaxabannaana u gudbiyo komishanka.
6. Ruqsadlaha haysta laba ruqsadood ama bixiya laba ama dhawr adeeg koronto ah, waxa ku waajib ah inuu adeeg ama ruqsad kasta xisaab gaar ah u sameeyo, gaar gaarna u xisaab xidho.

Qodobka 45aad. **Ogeysiinta Shilalka tamarta korontada**

1. Ruqsadlaha ama adeeg bixiye kasta waxa ku waajib ah inuu 24 saacadood gudahood ku ogeysiyo komishanka shil kasta oo sababa khasaare nafeed, dhaawac culus ama khasaare hantiyeed oo muuqda.
2. Si loo hubiyo badbaadada bulshada, ruqsadlaha waa in uu isla markiiba qaadaa tallaabooyinka degdegga ah ee badbaadada, laakiin waa in aanu wax ka beddel ku samayn



goobta shilka illaa komishanku baadhitaan sameeyo ama fasax cad bixiyo si waafaqsan qodobka 62aad ee xeerkan.

3. Ruqsadle kasta oo qariya, dib u dhiga ama si khaldan uga gaabsada bixinta ogeysiiska shilka wuxuu mutaysan doonaa ganaax lacageed oo u dhexeeya 5,000,000 ilaa 10,000,000 milyan oo somaliland shilling ah ama xabsi u dhaxeeya 1 illaa 2 sannadood iyadoo hadba loo eegaayo dhibta ka dhalatay falkaasi inta ay baaxadiisu le'egtahay
4. Komishanku marka uu helo ogaysiiska ku xusan faqradda 1aad wuxuu si degdeg ah iyo si waafaqsan qodobka 62aad ee xeerkan baadhis ugu samayn doonaa shilka dhacay iyo khasaaraha uu gaystay.
5. Komishanku wuxuu samayn doonaa nidaam diiwaan dhijital ah (electronic reporting system) si loo fududeeyo ogeysiinta shilalka iyo in xogtu si hufan loo keydiyo.

CUTUBKA 6AAD.

DHALINTA, GUDBINTA, QAYBINTA IYO IIBKA TAFARIIQDA KORONTADA IYO QANDARAASLAYAASHA FARSAMADA KORONTADA

Qaybta 1aad

Qodobka 46aad

Ruqsadlaha koronto dhalin

1. Ruqsadlaha haysta ruqsad koronto dhalin loo siiyay si waafaqsan xeerkan wuxuu lahaanayaa xuquuqaha iyo waajibaadyadan soo socda:
 - b. Inuu goobta ama goobaha ku xusan ruqsaddiisa oo qudha ka dhiso, hirgaliyo, hawlgaliyo, ilaaliyo, dayactiro oo maareeyo xarun koronto dhalin iyo kaabayaasha koronto dhalinta ee lagama maarmaanka u ah fulinta hawsha ruqsad loo siiyay.
 - t. Inuu si waafaqsan xeerkan u galo heshiis si uu awoodda koronto ee uu dhaliyo ugu gudbiyo ama ugaga iibiyo ruqsadle kale.
 - J. Inuu awood koronto ka dhaliyo ilaha tamareed ee waafaqsan xeerkan ee ku xusan ruqsaddiisa.
 - X. Inuu nidaamkiisa koronto dhalinta ku xidho shabakadda koronto gudbinta ee Qaran, haddii ay ka jirto aagga goobta ama goobaha uu ka hawlgalo, si uu korontada uu dhaliyo ugu gudbiyo ama in loo oggolaado inuu dhisto nidaam gudbin koronto uu korontada uu dhaliyo ugu gudbiyo ugana iibiyo nidaamka qaybin koronto isaga hoos yimaadda ama ruqsadle qaybin koronto ka hawlgala aagga uu ka dhaliyay awoodda koronto, haddii shabakadda koronto gudbinta Qaranku ka jirin, aagga uu ka hawlgalo.
2. Kasakow masuuliyadaha kor ku xusan, ruqsadlaha koronto dhalintu wuxuu u hoggaansamayaa shuruudaha ruqsadda ee ku qeexan ruqsaddiisa iyo waajibaadyada uu saarayo xeerkan.
3. Hawlaha koronto dhalinta waxa loo raacayaa xeernidaamiyaha koronto dhalinta ee hadba dhaqangalka ah.



Qaybta 2aad **Gudbinta korontada iyo Hawlgaliyaha Nidaamka Koronto Gudbinta**

Qodobka 47aad **Shirkadda Gudbinta Korontada ee Somaliland**

1. Dawladda iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay waxay wada aasaasi doonaan shirkad koronto oo wadaag ah (public private partnership company-PPP), shirkadaas wadaagga ah oo noqon doonta shirkad ganacsi oo ka madaxbannaan dhammaan adeeg bixiyayaasha korontada ee kale ee gaarka loo leeyahay, waxayna noqonaysaa shirkadda kaliya ee uu komishanku siinayo ruqsadda gudbinta koronto ee ka masuulka ah dhismaha, hirgalinta, dayactirka, gacan kuhaynta, hawlgalinta Nidaamka Gudbinta Korontada ee dalka iyo maamulka shabakadda korontada Qaranka.
2. Shirkadda korontada wadaagga ah (PPP) waxa lagu aasaasi doona xeer Madaxweune, waxaana loo diwaangalin doonaa si waafaqsan xeerka shirkadaha Qaranka iyo xeerkan, waxayna yeelan doontaa guddi maamul oo 7 xubnood ah (The Board of Directors) waxayna iska dhex dooran doonaan guddoomiye.
3. Shirkadda waxa lahaansheheeda uu ka dhexeynayaa dawladda iyo shirkadaha adeegga korontada ee gaarka loo leeyahay.
4. Shirkaddu waxay yeelanaysaa agaasime fulineed oo si daahfuran oo tartan ku salaysan ay u shaqaalaysiin doonto guddida maamulka (board of directors) ee shirkaddu.
5. Awoodaha iyo wadashaqaynta guddida maamulka, agaasimaha fulinta iyo shuruudaha lagu shaqaalaysiinaayo agaasimaha, waxa lagu qeexidoonaa xeerka aasaaska shirkadda.

Qodobka 48aad **Hawlaha iyo Masuuliyadaha Shirkadda**

1. Shirkadda korontada wadaagga (PPP) waxay leedahay oo ay fulinaysaa hawlahaan iyo awoodahaan soo socda:
 - b. Horumarinta, dayactirka iyo maaraynta kaabayaasha shabakadda gudbinta korontada Qaran.
 - t. Gudbinta awoodda korontada ee heerar ka folteyiyada sare.
 - j. Maareynta awoodda korontada iyadoo adeegsanaysa nidaamka shabakadda Qaran.
 - x.. Inay xaqiijinayso inay u siman yihiin ruqsadlayaashu dhalinta iyo qaybintu ugu xidhan nidaamyadoodaa shabakadda gudbinta koronta si waafaqsan xeerhoosaadka shabakadda isku xidhka gudbinta korontada Qaranka.
 - kh. Inay ruqsadlayaasha ay u adeegayso la gasho heshiis, kana qaaddo khidmad uu komishanku u ansaxiyey si waafaqsan xeerkan.
 - d. Inay fuliso hawl kasta oo kale oo hoos timaad lagama maarmaanna u ah meelmarinta ujeedooyinka iyo masuuliyadaha shirkadda.



2. Hawsha Gudbinta korontada iyo isku xidhka shabakadaha korontada waxa loo raacayaa xeernidamiyaha gudbinta korontada iyo Xeerhoosaadka shabakadda korontada ee uu komishanku soo saari doono, kaas oo aan ka hor imanayn xeerkan.
3. Shirkadaha adeegga korontadu waxay awood gaar ah u leeyihiin qaybinta iyo dhalinta korontada si waafaqsan xeerkan.

Qodobka 49aad

Heshiiska ku Xidhashada Shabakadda Gudbinta korontada Qaranka

1. Ruqsadlayaasha dhalinta iyo qaybintu si ay nidaamyadooda ugu xidhaan shabakadda korontada Qaranka waxay heshiis isku xidh la'galayaan maamulka shabakadda korontada.
2. Heshiiska isku xidhka ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobakani waa inuu koobsanayo arrimahan soo socda -
 - b.. Wadarta xaddiga tamarta korontada la gudbinayo.
 - t. Shuruudaha farsamada, tayada qalabka tamarta koronto.
 - j. Jadwalka adeegga
 - x. Masuuliyadda labada dhinac.
 - kh. Cawaaqibka jebinta heshiiska.
 - d. Shuruudaha lacag bixinta ama dammaanadaha lacag bixinta tamarta korontada.
 - r. Khidmadaha, shaxda khidmadaha iyo shuruudaha bixinta khidamadda adeegga
 - s. Waxkabeddelka iyo kaabista/dibu'eegista heshiiska iyo
 - sh. Shuruudo kasta oo kale oo guddidu ay go'aamiso in lagu daro.

Qaybta 3aad

Koronto Qaybinta

Qodobka 50aad

koronto qaybinta

1. Ruqsadlaha qaybinta koronto waxa uu fulinayaa hawlahaan iyo masuuliyadahan soo socda:
 - b. Dhismaha, rakibidda, hawlgalinta, ilaalinta, dayactirka, hagaajinta iyo maaraynta dhismayaasha iyo kaabayaasha lagama maarmaanka u ah qaybinta awoodda korontada ee heerarka fooltayjyada hoose iyo dhexe.
 - t. Inuu ka hawlgalo aagga ruqsadda loo siiyay oo qudha oo uu halkaas ka fuliyo qaybinta awood koronto heerarka fooltayjyada hoose iyo dhexe ah.
 - j. Inuu ruqsadlayaasha koronto dhalinta ka iibsado tamar koronto si waafaqsan heshiis iib koronto oo uu komishanku ansixiyay.
 - x. Inuu isagoon u baahnayn qaadashada ruqsad iib tafaariiq adeeg koronto, macaamiil la'galo heshiis kana iibiyo awood koronto, kagana iibiyo qiime adeeg koronto oo ku salaysan khidmad uu ansaxiyay guddida komishanku iyo inuu ruqsadle tafaariiqle adeeg koronto la'galo heshiis kana iibiyo awood koronto si waafaqsan qiime ku salaysan khidmad iyo heshiis iib koronto oo uu ansaxiyay guddida komishanku.



kh. Balaadhinta nidaamkiisa koronto qaybinta si waafaqsan qorshaha baahinta korontada iyo oggolaanshiyaha guddida komishanka.

2. Kasakow masuuliyadaha kor ku xusan, Ruqsadlaha qaybinta koronto waxa uu u hoggaansamayaa oo uu gudanayaa shuruudaha ruqsadda ee ku qeexan ruqsaddiisa.
3. Dhismaha, rakibidda, dayactirka, hawlgalinta iyo ilaalinta kaabayaasha iyo khadadka Koronto qaybinta waxa loo raaci doonaa xeerkan iyo xeeridaamiyaha koronto qaybinta ee hadba dhaqangalka ah.

Qaybta 4aad

Ruqsadda libka taafaariiqda Adeegga Korontada iyo Qandaraaslayaasha Farsamada Korontada

Qodobka 51aad

Ruqsadlaha libka Tafaariiqda Korontada

1. Komishanku waxa uu oggolaan karaa inuu qof siiyo ruqsadda tafaariiqda iibka korontada si waafaqsan xeerkan iyo xeeridaamiyaha ka farcama xeerkan. .
2. Ruqsadlaha tafaariiqda iibka korontadu waxa uu xaq u leeyahay in uu ruqsadle qaybin koronto jilmad ahaan kaga iibsado koronto oo uu tafaariiq ahaanna kaga iibiyo macaamiisha si waafqsan heshiis iyo qiima adeeg koronto oo ku salaysan khidmad uu ansaxiyay guddida komishanku.
3. Ruqsadlaha iibka tafaariiqda adeegga koronto wuxuu u hoggaansamayaa una bixinayaa adeegga korontada ruqsadda loo siiyay si waafqsan ruqsadda la siiyay, xeerkan iyo xeeridaamiyaha khuseeya.

Qodobka 52aad

Farsamada hawlaha Korontada

1. Qofna kuma shaqaysan karo farsamada hawlaha korontada, haddii aanu haysan ruqsadda farsamada koronto oo uu komishanku u siiyay si waafaqsan xeerkan iyo xeeridaamiyaha khuseeya.
2. Qofna lama siin karo ruqsad farsamo yaqaan koronto , haddii aanu ka haysan shahaadada xirfadda farsamada korontada mac-had ay dawladdu aqoonsantahay.
3. Cidda doonaysa in la siiyo ruqsada qandaarlaha koronto ama ruqsadda xirfadda korontadu waa inuu ka codsado komishanka si waafaqsan qaabka iyo shuruudaha uu dhigayo xeeridaamiyaha khuseeya.
4. Ma bannaana in hawlaha khuseeya nashqadaynta, dhisidda, hawlgalinta ama dayactirka kaabayaasha, xadkhaha gudbinta, qaybinta iyo dab galinta dhismayaasha ama hawlaha kale ee la xidhiidha loo diro cid aan ka haysan ruqsadle qandaasle koronto komishanka isla markaasna aan shahaadada xirfadda hawlaha korontada ee lagu sheegay faqradda 2aad qodobkan aan haysan.
5. Komishanku waa inuu abuuraa diiwaanka qaranka ee qandaraaslayaasha korontada (National Register of Electrical Contractors) si loo hubiyo hufnaan, tayada shaqada iyo ilaalinta macaamiisha.



Qodobka 53aad

Soo dejinta iyo Dhoofinta Korontada

1. Shirkadda wadaagga oo kaliya ayaa awood u leh inay ka keento am ka soo qaadato tamarta korontada dalal shisheeye.
2. Wasiirku markuu shuruudaha kor ku xusan hubiyo waxa uu talo soojeedin qoraal ah u gudbinayaa Madaxweynaha. Madaxweynuhu haddii uu oggolaado in tamar korontada laga keeno waddan shisheeye waxa uu ku soo saarayaa Xeer Madaxweyne in Shirkadda Waddaagu soo dhoofiso;
 - b) Waa inuu jiraa heshiis ganacsi oo laba geesood ah oo u dhexeeya Jamhuuriyadda Somaliland iyo dalka shisheeye ee laga soo dhoofinayo korontada
 - t) Waa in la sameeyo daraasad faahfaahinaysa faa'iidada uu qaranka u leeyahay.
 - j) Waa in la sameeyo daraasad faahfaahsan ee saamaynta ay deegaanka ku yeelaynso.
 - x) Waa in la hubiyo inay waafaqsan tahay tiknoolajiyadda casriga ah ee tamarta korontada.
3. Wasiirku marka uu shuruudaha kor ku xusan hubiyo waxa uu talo soojeedin qoraal ah u gudbinayaa Madaxweynaha. Madaxweynuhu haddii uu oggolaado in tamar korontada la soo dhoofiyo waxa uu ku soo saarayaa Xeer Madaxweyne in shirkadda gudbinta Korontada Qaranku soo dhoofiso.

CUTUBKA 7AAD

KHIDMADAHA IYO QIIMAHA ADEEG KORONTADA

Qodobka 54aad

Khidmadaha

Guddida Komishanka waa in ay si waafaqsan xeerkan u diyaariyaan xeernidaamiyaha khidmadaha iyo khidmada adeegga koronto bixinta, una gudbiyaan wasiirka si uu ansaxiyo.

Qodobka 55aad

Mabaadiida Khidmadaha

1. Guddida Komishanku waa in uu dejinta khidmadaha, lacagaha dib u cusboonaysiinta ruqsadaha iyo lacagaha kale ee adeegga korontada iyo wax-kabeddelkoodaba ku saleeyo mabaadii'dan soo socota:
 - b. Dejinta khidmadaha, lacagaha dib u cusboonaysiinta ruqsadaha iyo lacagaha kale ee adeegga korontada waa in ay noqdaan qaar xaq ah, maangalna ah islamarkaana ku salaysnaataa kharashka lagama maarmaanka u ah habsamida hawlaha meheradda.
 - t. Khidmadaha, lacagaha dib u cusboonaysiinta ruqsadaha iyo lacagaha kale ee adeegga korontada waa in ay noqodaan kuwo hagaajinaya tayada adeegga, wax kabeddel lagu sammayn karo oo dhallin kara in faa'iido macquul ah laga helo maalgalinta.



- j. Khidmadaha, lacagaha dib u cusboonaysiinta ruqsadaha, iyo lacagaha kale ee adeegga korontada waa inay dhiirrigaliyaan tartan, isticmaalka ilaha tamarta dhaqaale ahaan jaban, waxqabad wanaagsan iyo soo jiidasho maalgashi.
 - x. Komishanku markuu khidmad ama lacagaha dib u cusboonaysiinta ruqsadaha iyo lacagaha kale ee adeegga ee korontada, waxkabeddeli karo waa inay ku timaadaa heshiis ku salaysan qiimayn iyo daraasad dhab ah, kana turjumaya maslaxadda shirkadaha adeegga korontadda iyo macaamiisha (shacabka).
2. Ruqsadluhu, marka uu dejinayo khidmadaha iyo qiimaha iibka, waa inuu xaqiijiyo in aanu macaamiisha isku duruufaha ah ama macaamiisha kala duwan ugu kala eexan ama ku kala faquuqin arrimahan soo socda-
- b. Goorta iyo goobta bixinta tamarta korontada.
 - t. Wadarta xaddiga tamarta korontada la dalbaday.
 - j. Ujeeddada tamarta korontada loo dalbaday ama
 - x. Culayska isticmaalaha iyo heerka awoodda.
3. Komishanku waxa uu awood u leeyahay inuu khidmado iyo qiime adeeg bixineedyo kala duwan u dejiyo macaamiil kala gedisan.

Qodobka 56aad

Reebanaanta Qaadista Lacagaha iyo khidmadaha adeegyada Korontadda ee aanu Komishanku Ansixin

1. Ruqsadluhu ma qaadi karo Khidmado ama lacago kale oo la'xidhiidha adeegga korontada kuwaas oo aanu ansixinin komishanku.
2. Ruqsadluha ku xad gudba faqradda (1) ee qodobkan waxa uu galay faldembiyeed, waxaanu marka maxkamadi ku hesho dambigaas mutaysanayaa cigaab ah ganaax lacageed oo u dhexeeya 20 (20,000,000 ilaa 30,000,000 milyan oo shillin somaliland ah.

Qodobka 57aad

Codsiga ansaxinta Khidmadaha

1. Ruqsadluhu waa inuu si waafaqsan habka iyo qaabka uu dhigo xeer-nidaamiye, guddiga komishanka uga codsado in loo ansaxiyo soo jeedinta khidmadaha tafaariiqda ee uu dejinayo.
2. Guddiga Komishanku waxay, afar iyo toban (14) maalmood gudahood oo ka bilaabmaysa taariikhda uu helo codsiga loogu soo gudbiyay si waafaqsan faqradda (1), soo jeedinta khidmadda tafaariiqda ku baahin doontaa idaacadaha, wargeysyada iyo ilaha warbahinta dalka, kuna warglinaysaa dadweynaha in ciddii diidmo ama ra'yi ka qabta soo jeedinta khidmaddu ay muddo 30 maalmood gudahood ah guddida ugu soo gudbiso is-hortaag ama ra'yi ay ka qabto oo qoraal ah.
3. Kaddib markay dhammaato muddada 30 ka maalmood ee lagu sheegay faqradda (2) ee qodobkan, guddidu waxay qaban doontaa dhegaysi u furan dadweynaha si uu u dhegaysto ugana go'aan gaadho is-hortaagga ama ra'yiga loo soo gubiyay iyo jawaab celinta codsadaha.
4. Guddidu waxay 15 cisho gudahood kaddib taariikhda dhagaysiga is-hortaagga ama ra'yiga iyo jawaab celinta ku xusan faqradda 3aad, go'aan kaga gaadhaysaa codsiga codsadaha, go'aan kaas oo noqon kara, inuu:



- b. oggolaado oo uu ansaxiyo soo jeedinta khidmadaha codsaduhu u soo gudbiyay ama
- t. Diido codsiga ansaxinta soo jeedinta khidmadaha ee codsaduhu soo gudbiyay ama
- j. Wax kabadelo soo jeedinta khidmadaha codsada, sidaasna ku ansaxiyo.

Qodobka 58aad

Daabacaadda Khidmadaha Tafaariiqda

Ruqsadluhu waa inuu khidmadaha loo ansaxiyo ama wax ka beddelka tariifaddaba uu ku baahiyo idaacadaha, wargeysyada iyo ilaha kale ee warbaahineed si dadweynuhu u ogaadaan.

Qodobka 59aad

Heshiisyada iibka

1. Ruqsadlaha doonaya inuu galo heshiis iibsi koronto wuxuu u gudbinaya soo jeedinta heshiiska iibka korantada guddida komishanka, si uu u ansaxiyo.
2. Guddida komishanku waa inuu 30 maalmood gudahood oo ka bilaabmayso taariikhda uu helo heshiiska la soo jeediyay, ku ansaxiyo ama ku diido heshiiska la soo jeediyay.
3. Hadii uu diido heshiiska la soo jeediyay, guddidu waxay ruqsadlaha siinysaa go'aanka diidmada oo qoraal ah oo si cad u tibiaxaya sababaha diidmadaas.
4. Heshiiska iibka korontadu waa inuu koobsado arrimahan soo socda: -
 - b. Wadarta xaddiga tamarta korontada la qaadanayo.
 - t. Shuruudaha farsamada iyo tayada tamarta koronto.
 - j. Jadwalka bixinta tamarta korontada.
 - x. Masuuliyadda bixinta iyo qabashada tamarta korontada.
 - kh. Cawaaqibka jebinta heshiiska.
 - d. Shuruudaha lacag bixinta ama dammaanadaha bixinta lacagta korontada la iibsaday.
 - r. Khidmadaha iyo shaxda khidmadaha iibsashada korontada la'kala iibsanayo.
 - s. Muddada heshiiska.
 - sh. Waxkabadelka iyo kaabista/dibu'eegista heshiiska iyo
 - dh. Shuruudo kasta oo kale oo uu xeeridaamiye dhigo in lagu daro.
5. Guddida Komishanku waxa ay wax ka beddel ku samayn karaan khidmadaha labada ruqsadle ku heshiiyeen isayagoo ka duulaya mabaadii'da khidmadaha ee ku xusan qodobka 41aad ee xeerkan

CUTUBKA 8AAD

KORMEERKA IYO BAADHISTA

Qodobka 60aad

Kormeerka

1. Komishanku wuxuu si joogta ah kormeer ugu samayn doonaa hawlgallada iyo adeeg bixinta ruqsadlayaasha iyo adeeg bixiyayaasha xeerkan khuseeyo si uu u xaqiijiyo in ruqsadlayaashu iyo adeeg bixiyayaashu ku dhaqmayaan una hoggaansameen xeerkan.
2. Si uu u guto waajibaadka kormeerka ee komishanka ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, guddida komishanku waxay magaacabaysaa cid aqoon iyo xirfad ku filan u leh, kormeere ama kormeerayaal.



Qodobka 61aad

Awoodaha iyo Waajibaadyada Kormeeraha

1. Kormeeraha loo magacaabo si waafaqsan qodobka 60aad ee xeerakani, wuxuu awood u leeyahay inuu goor kasta oo macquul ah isagoon wax ogaysiis ah bixin:
 - b. Galo oo kormeero/fatasho xarumaha ruqsadlaha
 - t. In la tuso oo uu fatasho mashinnada iyo xadhkaha, tiirarka iyo qalabka korontada ee ruqsadluhu isticmaalayo.
 - j. In la tuso oo uu fatasho buugta, diiwannada iyo qoraallada xisaabaadka, shaqaalaha iyo hawlaha ruqsadlaha ee uu ugu baahdo hawsha fatshidda ama baadhista uu fulinayo;
 - x. Inuu dalbado in nuqullo looga sameeyo buugta, diiwannada iyo qoraallada ku ku xusan xarafaka (j) ee kore ee uu hadba u baahdo.
 - kh. Inuu cidda masuulka ka ah ama maamusha xarunta ruqsadlaha ka dalbado inuu faahfaahin ka siiyo buugta, diiwaannada iyo qoraallada ku xusan xarafka (j) ee u baahdo in loo faahfaahiyo.
 - d. Inuu ku amro maamulka ama masuulka xarunta ruqsadlaha uu fatashayo ama baadhayo inay joojiso ama beddesho isticmaalka mashiin ama qalab aanu xeerkan oggolayn in la isticmaalo.
2. Kormeeruhu waxa uu hawl kormeer fulin karaa oo kaliya si loo xaqiijiyo in ruqsadluhu u hoggaansamay waajibaadyada fulinta hawsha ruqsadda ruqsadlaha ama/iyo in hawlaha tamarta korontada loo fuliyo si waafaqsan xeerka iyo xeeridaamiyayaasha khuseeya .
3. Kormeeruhu wuxuu, si uu u guto hawsha kormeer ee uu fulinyo, awood u leeyahay in dhismayaasha iyo dhulka dawladda iyo kuwa cid gaar ahi leedahay uu isagoon ogaysiis bixinin galo oo kormeero maalintii saacadaha u dhexeeya 6:00 subaxnimo ilaa 6:00 galabnimo.
4. Kormeeruhu wuxuu, ka hor inta aanu gelin xarunta ama goobta ama dhismaha uu kormeerayo ama baadhayo, isku sheegayaa oo uu tusayaa aqoonsigiisa kormeerenimo cidda joogta ama masuulka ka ah xarunta ama goobta uu kormeerayo.

Qodobka 62aad

Baadhista

1. Komishanku wuxuu awood u leeyahay inuu baadhis ku sameeyo, haddii uu ogaado ama ay cid uga soo cabato, in ruqsadle ama adeeg bixiye aanu ku dhaqmaynin ama ku xad gudbay xeerkan ama khidmadaha u dhigan adeegiisa.
2. Komishanku waxa uu baadhi doonaa shil kasta oo ka dhaca tamarta koronto oo sababa khasaare nafeed ama hantiyeed ee uu ogaado ama loo soo ogaysiiyo, si waafaqsan qodobka 45aad ee xeerkan.
3. Marka uu fulinayo baadhista shilalka ku xusan qodobkan, guddida komishanku wuxuu u magacaabayaa baadhe/yaal loo xilsaaro baadhista.
4. Guddida Komishanku iyadoo ka duulaysa natijada baadhista waxay soo saari kartaa awaamiir ay ku amrayso ruqsadlaha ay khusayso in uu qaado tallaabooyin sixitaan ama tallabooyinka lagagama marmaanka u ah wax ka qabashada ama suulinta sababaha dhaliyay shilka.
5. Qof kasta oo baadhista lagu sheegay qodobkani khusayso, wuxuu xaq u leeyahay inuu codsado in la siiyo nuqul ka mid ah warbixinta baadhista, ra'yiga iyo go'aanada



komishanka ee baadhista iyadoo uu qofku bixinayo khidmadda ku waajibta ee uu dhigo xeerhoosaad uu soo saaro komishanku.

6. Haddii natiijada baadhistu muujiso in uu dhacay ama laga yaabo in la galay faldambiyeed ku xusan xeerkan, guddida komishanku waxa uu warbixinta baadhista iyo caddaymaha lagu helay baadhista u gudbin doonaa Xeerilaaliyaha Guud si uu u baadho caddaaladna u horgeeyo cidda ku lugta leh faldambiyeedkaas.

CUTUBKA 9AAD

XAQA HELIDDA IYO DHEXMARKA DHULKA

Qodobka 63aad

Xaqa helidda dhul ee Adeegbixiyaha

1. Ruqsadlaha u baahda dhul bannaan oo uu ka dhiso xarun koronto dhalin ama ku dhiso ama rakibo kaabayaasha koronto, gudbinta ama qaybinta si uu dadweynaha u gaadhsiyo bixinta adeegga koronto oo waafaqsan xeerkan, isla markaana haysta oggolaansho guddida komishanku ugu oggolaaday dhismaha xarunta koronto dhalinta ama rakibidda kaabayaashaas adeegga koronto gubinta ama qaybintu waxa uu xaq u leeyhay inuu:
 - b. Si waafaqsan xeerarka iyo xeernidaamiyayaasha khuseeya maamulka dhulka Golaha Deegaanka ama maamulka degmada ay khusayso ama Wasaaradda Hawlaha Guud, Dhulka iyo Guryaynta uga codasdo dhulka uu u baahan yahay, haddii dhulka uu doonayaa yahay dhul dan guud ah ama
 - t. Heshiis wareejin dhul ah la'galo mulkiilaha dhulka, haddii cid gaar ahi leedahay dhulka.
2. Golaha Deegaanka ama maamulka degmada ama Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Guryaynta hadba ka ay tahay ee hela codsiga ruqsadlaha iyo oggolaanshaha Komishanka ee ku xusan faqradda 1aad (b) ee qodobkan, haddii uu ku qanco in ay ku jirto danta guud waxa uu ruqsadlaha siin karaa dhulka uu codsaday si waafaqsan xeerka maamulka dhulka.
3. Haddii dhulka la codsaday yahay dhul cid gaar ahi leedahay oo ay suurto gali weydo in ruqsadlaha iyo mulkiiluhu wada galaan heshiis wareejin dhul oo ay danta guudna ku jirto in dhulkaasi lagu wareejiyo ruqsadlaha, komishanku waxa uu ka codsan doonaa Golaha Deegaanka ama maamulka degmada, hadba ka ay tahay, in si waafaqsan xeerarka ay khusayso dhulkaas danguud loola wareego oo laguna wareejiyo ruqsadlaha.
4. Ruqsadlaha lagu wareejinayo dhulka danta guud loola wareegay waxa uu masuul ka yahay inuu mulkiilaha dhulkaas siiyo magdhow u dhigma qiimaha dhulkaas iyo cidda deggan dhulkaas, haddii ay jirto inuu siiyo kharashka ay kaga guurayso goobtaasi.
5. Magdhawga ku xusan faqradda 4aad ee qodobkani, ma hor istaagayso ama waxba uma dhimayso magdhawga uu mulkiilaha dhulkaas iyo cidda deggani xaq ugu leedahay Golaha Deegaanka ama maamulka degmada ee ay dhigayaan xeerarka khuseeyaa.



Qodobka 64aad

Xaqa Marinka iyo Isticmaalka Dhulka ee Ruqsadlaha

1. Adeeg bixiyaha adeeg koronto waxa uu xaq u leeyahay in uu hoos ama dhex ama kor marsado xadhdhaha ama tiirarka xadhdhaha qaybinta ama gudbinta koronto dhul kasta oo aan dhisnayn si waafaqsan qodobkan iyo xeerarka khuseeya .
2. Adeeg bixiyuhu si uu u adgeesado xuquuqdiisa faqradda 1aad ee qodobkan, waa inuu ugu yaraan 30 casho ka hor inta aanu wax hawl ah ka qaban dhulkaas ogaysiis qoraal ah ku wargaliyo.
3. Dawladda hoose ee ay khusayso hadba ka ay tahay, haddii dhulku yahay waddo ama dhul dan guuda ama mulkiilaha dhulka ama cidda uga wakiilka ah ama cidda deggan, hadba ka ay tahay , haddii dhulka yahay dhul gaar loo leeyahay.
4. Ogeysiiska qoraalka ah ee ku xusan faqradda 2aad waa inuu si cad oo dhammaystiran u tibiaaxo nooca iyo baaxadda hawsha ruqsadluhu ka fulinyo dhulka.
5. Maamulka dawladda hoose marka uu helo ogaysiiska ku xusan faqradda 2aad, waxa uu muddo 14 cisho gudahooda ku siinayaa ruqsadlaha oggolaansho loogu oggolaanayo in uu dhulka u isticmaalo si waafaqsan shuruudo lagu xidho iyo xeerarka khuseeya. ruqsadlaha loo ogolaado isticmaalka dhulku wuxuu bixinayaa khidmadda uu hadba u gooyo maamulka dawladda hoose.
6. Mulkiilaha, wakiilka mulkiilaha ama cidda gacanta ku haysa dhulka gaarka loo leeyahay ee la gaadhsiiyo ogeysiiska qoraalka ee ku xusan faqradda 2aad wuxuu karaa inuu ka hor dhammaadka muddada ogeysiiska ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan uu adeeg bixiyaha u oggolaado isticmaalka dhulka si waafaqsan heshiis uu adeeg bixiyaha lagalo ama diido codsigaas.
7. Haddii adeeg bixiyaha iyo mulkiilaha ama cidda gacanta ku haysa dhulku gaadhi waayaan heshiis, adeeg bixiyuhu wuxuu karaa inuu ka codsado guddida komishanka in ay go'aan ka gaadho arrinka.
8. Guddida komishanku kaddib marka ay deristo xaaladda ee ay dhegaysato dhinacyada, haddii ay u aragto lagama maarmaan waxa ay soo saari go'aan qoraal ah oo loogu oggolaanayo adeeg bixiyaha inuu u isticmaalo dhulkaas. Fulinta ujeeddada ku cad ogeysiinta qoraalka ee ku xusan faqradda 4aad ee kore si waafaqsan shuruudo uu cayimo guddidu.
9. Adeeg bixiyaha loogu oggolaado isticmaalka dhulka si waafaqsan faqradda 8aad ee kore wuxuu ka hor isticmaalka dhulka uu ogaysiis qoraal ah oon ka yarayn 10 maalmood ku wargelin doonaa mulkiilaha ama cidda gacanta ku haysa ama deggan dhulka.
10. Adeeg bixiyaha si waafaqsan qodobkan loogu oggolaaday isticmaalka dhulku waa inuu ka taxaddiro waxyeello gaadha dhulkaas, isla markaana u hoggaansamo waajibaadka ilaalinta deegaanka , bedqabka iyo caafimaadka bulshada.
11. Adeeg bixiyuhu wuxuu masuul ka yahay oo uu magdhaw ka bixinayaa waxyeelada hantiyeed ama nafeed ama deegaan ee ka dhasha hawlaha uu ka fuliyo dhulka loo oggolaaday in uu isticmaalo. masuuliyadda magdhawga iyo qaddarka magdhawga ee uu bixinayo ruqsadluhu waxa loo raaci doonaa xeernidaamiye ka dheegma xeerkan iyo xeerarka khuseeya ee dhaqangalka ah.



Qodobka 65aad

Xaqa Gelidda Dhulka iyo goynta dhirta


Adeeg bixiyaha loo oggolaado isticmaalka dhul si'waafaqsan qodobka 64aad ee cutubkan, wuxuu xaq u leeyahay in:-

1. Marka uu u baahdo uu galo dhulkaas si uu u dayactiro ama u hagaajiyo ama ugala baxo ama u beddelo xadhkaha ama tiirarka ama agabka korontada uu dhulkaasi hoos, kor ama dhex mariyay ama ka taagay ama ku xidhay.
2. Si waafaqsan Xeerka khuseeya uu u gooyo dhir ama geed, haddii dhirtaasi ama geedkaasi carqalad ku tahay fulinta hawsha dhigidda xadhkaha ama tiirarka gudbinta ama qaybinta korontada ama khatar ku keeni karo bedqabka xadhkaha iyo tiirarka gudbinta ama qaybinta korontada.

Qodobka 66aad

Jeexidda iyo dhexmarka Waddooyinka

1. Adeeg bixiyaha loo oggolaado inuu xadhkaha ama tiirarka gudbinta ama qaybinta koronto hoos mariyo, dhexmariyo ama kor mariyo suuq ama waddo wuxuu xaq u leeyahay:
 - b. In uu qodo ama jeexo waddada, laamida ama biriishka si uu u dhigo una dhexmariyo ama uga taago tiirar koronto qaybin ama gudbin.
 - t. In uu daboolka ka qaado ama furo, jeexo saaqiyadaha, bullaacadaha ama biyo mareenada dhex mara ama hoos mara ama ku dhaw suuqa, waddada ama biriishka iyo
 - j. Inuu dhigo xadhko ama garariyo qalab ama aalado kale ee gudbinta ama qaybinta korontada, sidoo kalena ka qabto hawl kasta oo kale ee lagama maarmaanka u ah fulinta adeegga koronto ee uu bixiyo.
2. Adeeg bixiyuhu wuxuu ka hor inta aanu wax hawl ah fulin Golaha Deegaanka ama dawladda hoose siinayaa qoraal ogeysiis 15 maalmood ah, haddii aanay jirin xaalad degdeg ah; sidoo kalena adeeg bixiyuhu wuxuu ogeysiiskaas siinayaa mulkiilayaasha qasabadda/beebabka biyaha, xadhkaha taleefannada iyo aaladaha kale ee halkaas ku jira ee laga yaabo in ay saamayso hawsha adeeg bixiyuhu.
3. Adeeg bixiyuhu wuxuu xuquuqaha qodobkani dhigayo uu adeegsan doonaa si waafaqsan awaamiirta dawladda hoose, nashqadaha u degsan iyo halbeegyada uu dhigo xeernidaamiyaha khuseeya.
4. Adeeg bixiyaha fulinaya hawl ama hawlo waafaqsan qodobkani wuxuu u hoggaansamayaa xeerarka dhaqangalka ah iyo xeernidaamiyayaasha uu soo saaro komishanku iyo xeerhoosaadyada khuseeya ee dawladda hoose, wuxuuna ku gabogabaynayaa hawshaas si degdeg ah oo aan dib u dhac lahayn, wuxuuna hagaajinayaa oo nadiifinayaa waddada, biriijka, bullaacadda ama biyo mareenka.
5. Haddii adeeg bixiyuhu daahiyo ama ku guuldarraysto gudashada dhammaan ama qayb ahaan waajibaadkiisa ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan, maamulka dawladda hoose ee ay khuseyso waxa uu xaq u leeyahay inuu fuliyo hawlaha uu ka gaabiyay adeeg bixiyuhu.
6. Adeeg bixiyaha waxa ku waajib ah in uu dawladda hoose u magdhabo kharashka kaga baxay fulinta hawsha ku xusan faqradda 5aad ee qodobkan.



CUTUBKA 10AAD

XUQUUQAHA IYO WAAJIBAADKA MACMIILKA

Qodobka 67aad

Wajibaadka Macmiilka

Macmiilka isticmaala adeeg koronto waxa waajib ku ah inuu u hoggaansamo halbeegyada bedqabka korontada si waafaqsan xeerkan iyo xeerndaamiyayasha hadba uu soo saaro guddida komishanku.

Qodobka 68aad

Siinta iyo jarista adeegga koronto

1. Ruqsadlaha koronto qaybinta waxa ku waajib ah in uu u galiyo ama siiyo adeeg koronto macmiilka ka dalbada inuu dhismihiisa u galiyo adeeg koronto, haddii aanay jirin asbaab uu dhigay xeerndaamiye oo ka reebaysa gudashada waajibkan.
2. Ruqsadlaha koronto qaybinta waxa uu xaq u leeyahay inuu macmiilka ka gooyo adeegga korontoda haddii uu macmiilku sidaa ka codsado ama macmiilku bixin waayo khidmaddii adeegga korontada muddo dhan laba bilood ama ku xad gudba waajibkiisa heshiiska adeeg koronto ama si sharci darro ah ugu xidha adeeggiisa koronto iyo xaaladaha kale ee uu dhigo xeerndaamiyaha khuseeyaa.
3. Qofna loogama jari karo, loogumana diidi karo in loo galiyo koronto sabab la xidhiidha in macmiil hore oo ku jiray dhismuhu aanu bixin lacagtii lagu soo dallacay, mulkiilahana looma raaci karo dayntaasi guriga. Haddii macmiilka ruqsadluhu uu adeega koronto siinayaa uu yahay kirayste waa inuu ruqsadluhu heshiis qoraal ah la galaa.
4. Ruqsadlaha koronto qaybinta wuxuu dib ugu gelin doonaa adeegga koronto macmiilka bixiyay khidmadda adeegga ee ku baaqatay.
5. Xeerndamiye komishanku soo saaro ayaa loo raaci doonaa wajibaadka ruqsadlaha qaybinta koronto iyo xaq uu u leeyahay inuu macaamiishiisa ka jaro adeegga koronto.
6. Ulajeeddada cutubkan, ruqsadle waxa loola jeedaa ruqsadlaha qaybinta koronto.

Qodoka 69aad

Hakinta Adeegga koronto

1. Ruqsadlaha koronto qaybinta waxa uu si ku meelgaadh ah macaamiisha uga hakin karaa adeegga koronto, xaaladahan soo socdo awgood;
 - b. Haddii ay timaaddo xaalad degdeg ah oo waxyeelayn karta nafta, caafimaadka iyo bedqabka dadka ama burbur ama waxyeello hantiyeed.
 - t. Haddii hakinta adeeggu ka dhashay cillad farsamo awgood ama fulinta hawlo dayactir, ballaadin ama horumarin hawsha ruqsadlaha oo qorshaysnayd.
 - t. Haddii komishanku amro hakinta adeegga korontada ama
 - x. Sabab kale oo uu dhigo xeerndaamiye awgeed.
2. Haddii aanay hakintu ahayn mid ku timid cillad farsamo oo degdeg ah ama xaalad degdeg ah, ruqsadluhu waa inuu ka hor hakinta sii ogaysiiyo macaamisha si waafaqsan xeerndaamiyaha khuseeya, hakinta adeegga korontaduna waa inuu qaato muddo kooban.



Qodobka 70aad **Mas'uuliyadda Magdhawga**

1. Ruqsadlaha wuxuu ka masuul yahay waxyeellada hantiyeed ama nafeed ama jidheed ee macmiilka ee ka dhasha adeegga koronto, wuxuuna macmiilka siinayaa magdhaw, haddii aan la caddeyn:
 - b. In waxyeeladaasi ku timid sabab uu leeyahay macmiilku ama cid saddexaad ama
 - t. In sababta keentay waxyeeladaasi tahay mid ka baxsan awoodda ama iraadada adeeg bixiyaha.
2. Go'aaminta sababta dhalisay waxyeellada ku xusan qodobkan iyo magadhawga la siinayo macmiilka waxa loo raaci doonaa xeerarka ay khuseyso iyo xeernidaamiye ka dheegma xeerkan.
3. Ulajeeddada qodobkan, macmiil waxa loola jeedaa mulkiilaha ama cid ku nool ama deggan ama ka shaqaysa ama joogtay dhismaha ama hoyga ruqsadlaha siiyo adeegga koronto.

Qodobka 71aad **Tayada Adeegga iyo Qalabka Korontada**

Adeeg bixiye kasta waxa ku waajib ah:

1. Inuu u hoggaansamo halbeegyada u dejisan tayada adeegga iyo qalabka korontada ee ay dhigaan xeernidaamiyaha tayada qalabka iyo adeegga korontada.
2. Inuu dhegaysto oo wax ka qabto cabashada macaamiishu u soo gudbiyaan si waafaqsan habraaca cabashada macaammisha ee uu dhigo xeernidaamiyaha khuseeya.

Qodobka 72aad **Saacadda korontada**

1. Tirinta caddadka tamarta koronto ee uu isticmaalay macmiilku, ama caddadka tamarta koronto iyo muddada loo fidiyay adeegga isku xidhka waxa loo raacayaa saacad uu ansixiyo komishanku kaddib marka uu kala tashado Hay'adda Tayada ama saacad kale oo ay ku heshiiyaan adeeg bixiyaha iyo macmiilku.
2. Qiyaasta isticmaalka adeegga koronto ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waxa loo raaci doonaa xeernidaamiye uu soo saaro wasiirku.

Qodobka 73aad

Isweydaarasashada Awoodda koronto ee Adeeg bixiyaha iyo Macmiilka

Macmiil kasta oo leh ilo tamareed oo cusboonaata oo uu isagu leeyahay oo uu ka dhaliyo awood koronto oon ka badnayn 500 KW, isla markaana isticmaala adeeg koronto oo uu ka helay ruqadle qaybin koronto, wuxuu xaq u leeyahay inuu ka codsado lana galo ruqsadlaha koronto qaybinta heshiis koronto isweydaarsi.

1. Adeeg bixiyaha hela codsiga ku xusan faqradda 1aad wuxuu macmiilka u soo gudbiyay codsigaasi uu la gali doonaa heshiis isweydaarsi koronto (si waafaqsan xeernidaamiye loo soo saaray si waafaqsan xeerkan)
2. Ulajeeddada qodobkan "Koronto isweydaarsi" waxa loola jeedaa nidaam barbar soconaya nidaamka qaybinta korontada ee ruqsadlaha oo loo raacayo saacad ama saacado isu'tirinaya ama barbar dhigaya:



- b. Caddadka awoodda koronto ee uu ruqsadluhu siiyay macmiilka dhaliya tamar cusboonaata iyo
- t. Caddadka awoodda koronto ee uu ruqsadluhu ka helay macmiilka dhaliyay tamarta cusboonaata.

CUTUBKA 11AAD KORONTO GELINTA MIYIGA

Qodobka 74aad

Qorshaha iyo Tabaha fulinta Koronto gelinta miyiga

1. Wasiirku waxa uu muddo sannad gudaheed ah oo ka bilaabmaysa taariikhda dhaqangalka xeerkan, ku diyaarin doonaa qorshaha iyo tabo fulineed/istaratajiyadda koronto gelinta miyiga; isla markaana si joogta ah waxkabeddel iyo kaabis ku samayn doonaa qorshihiisa.
2. Wasiirku waxa uu sannad walba Golaha Wasiirada u gudbin doonaa warbixinta fulinta qorshaha iyo istraatiijiyadda koronto gelinta miyiga; warbixintaasina waa inay tibaaxdo:
B. Goobaha miyi'yada ah ee ay gaadhay shabakadda koronto gudbinta Qaranku.
T. Goobaha miyi'yada ee laga hirgaliyay lana gaadhsiiyay adeeg koronto oo ka madaxbannaan shabakadda koronto gudbinta oo ay ku jiraan nidaamyada tamarta korontada cusboonaata.

Qodobka 75aad

Dabagal iyo Qiimeyn

1. Wasiirku waxa uu xaqiijinayaa in la sameeyo keydka xogaha koronto gelinta miyiga si loola socon karo horumarka koronto gelinta miyiga iyo goobaha miyiga ah ee mudan in la gaadhsiiyo koronto.
2. Wasiirku waxa uu sannad walba qiimayn ku samayn doonaa fulinta qorshaha iyo Tabaha fulinta koronto gelinta miyiga iyo raadka mashaariicda koronto gelinta miyigu ku yeesheen horumarka dhaqaalaha iyo bulshada.

Qodobka 76aad

Tallaabooyinka Fulinta koronto gelinta Miyiga

1. Wasiirku waxa uu soo saari karaa siyaasado, habraacyo iyo xearnidaamiyayaal u gaar ah oo ujeedkoodu yahay kor u qaadidda iyo horumarinta koronto gelinta miyiga, kuwaas oo ay ku jirayso dhiirrigalin maaliyadeed o la siiyo adeeg bixiyayaasha maalgalinaya koronto gelinta miyiga.
2. Wasiirku waxa uu soo saari karaa xearnidaamiye dhigaya halbeegyo u gaar ah oo lagu dabbaqayo farsamada, tayada koronto galinta iyo warbixinaha hawlaha adeeg bixiyayaasha ku fooggan koronto galinta miyiga, si loo dhiirrigeliyo maalgashiga iyo hoos u dhigista qiimaha koronto galinta miyiga.



CUTUBKA 12AAD

TAMARTA CUSBOONAATA IYO BEEKHAAMINTA KORONTADA

Qodobka 77aad

Tamarta Cusboonaata

1. Wasaaraddu waxay kor u qaadaysaa horumarinta iyo isticmaalka teknoolajiyadda ilaha tamarta cusboonaada oo ay ka mid yihiin qorraxda, dabaysha, hirarka badda, qaaca kulaylka dhulka, hay'darojiinta cagaaran iyo qashinka aan sumaysnayn.
2. Wasaaraddu waxay dhiirrigelinaysaa isticmaalka tamarta cusboonaata iyada oo raacaysa tubahan ay ka midka yihiin:
 - b. Samaynta istaraatiijiyad qaran oo isku duwaysa cilmibaadhista tamarta cusboonaata.
 - t. Kobcinta xirfadda iyo kartida shaqaalaha adeeg bixiyayaasha korontada ee dhanka dhalinta, qaybinta iyo suuqgaynta korontada tamarta cusboonaata.
 - j. Dhiirrigelinta horumarka ku habboon awoodda diyaarinta iyo waxsoosaarka ,rakibaadda, dayactirka iyo isticmaalka qalabka iyo teknoolajiyadda tamarta cusboonaata.
 - x. Kor u qaadista xidhiidhka iyo iskaashiga hay'adaha caalamiga ah ee ka shaqeeya tamarta si loo gaadho awood buuxda oo looga faa'idaysan karo ilaha tamarta cusboonaata ee dalka.
- Kh. Samaynta xarun lagu keydiyo xogaha tamarta cusboonaata.

Qodobka 78aad

Beekhaaminta iyo tayaynta Tamarta Korontada

1. Wasaaraddu waxay tayayn iyo beekhaamin u samaynaysaa mashaariicda tamarta qaran.
2. Wasaaraddu, waxay horumarinaysaa qorshaha beekhaaminta iyo tayaynta tamarta iyadoo xaqiijinaysa:
 - b. In lagu muujiyo calaamadaha heerka tayo ee qalabka korontada iyo agabka kale ee la isticmaalayo.
 - t. Qaadista tallaabo kasta oo lagama maarmaan ah si loo abuuro wacyigelin loona faafiyo macluumaadka khuseeya tayaynta isticmaalka tamarta iyo beekhaaminteeda.
 - j. Ku dhiirrigelinta macaamiisha, shirkadaha bixiya adeegga koronto iyo hay'adaha cilmibaadhista ee beekhaaminta tamarta.
 - x. Fulinta barnaamijyo iskaashi oo la'xidhiidha tayaynta isticmaalka tamarta iyo beekhaaminteeda.
- Kh. Bixinta dhiirrigelin maaliyadeed, marka shirkad koronto ay maalgelin ka samaynayso miyiga.

CUTUBKA 13AAD

MAALGASHIGA IYO MAALGELINTA TAMARTA KORONTADA

Qodobka 79aad

Maalgashiga

1. Wasaaraddu iyadoo u raacaysa Xeerka Maalgashiga iyo xeerarka kale ee dhaqangalka ah waxa ay masuul ka tahay maalgashiga tamarta korontada ee dalka.



2. Iyadoo ka duulaysa siyaasadda iyo qorshayaasha qaran ee tamarta, wasaaraddu waxay si waafaqsan xeerarka u dhigan u dhiirigelinaysaa maalgashiga shisheeye ee tamarta korontada, iyadoo dhawraysana xuquuqda shirkadaha korontada ee waddaniga ah iyo guud ahaan maalgashadayaasha tamarta korontada.
3. Wasaaraddu, iyada oo la kaashanaysa wasaaradaha u xilsaaran maaliyadda, raacaysana Xeerka Maalgashiga waxa ay diyaarin doontaa jawi oggolaan kara soona jiidan kara in shirkadaha shisheeye iyo kuwa waddaniga ah maalgashadaan tamarta korontada .
4. Wasaaraddu waxa ay dejin doontaa xeerndaaamiye lagu dhaqo kuna salaysan tartanka suuqa xorta ah oo soo jiita maalgashadayaal shisheeyaa iyada oo la raacayo xeerka maalgashiga.
5. Wasaaraddu iyada oo ka duulaysa xaqiijinta ka midho dhalinta hadafyada qorshaha korontada qaranka, waxay heshiisyo maalgalineed la geli kartaa hay'ado caalami ah, maalgashadayaal shisheeye ama maalgashadayaal waddani ah
6. Wasaaraddu waxa ay dhiirrigalin doontaa, mudnaanna siinaysaa maalgashiga waddaniga ah ee dhanka tamarta korontada, waxaanay si loo helo maalgashi shisheeye dejin doontaa siyaasado iswaafajinaya maalgashiyada muwaaddiniinta iyo maalgashiyada shisheeyaha iyada oo eegaysa danta guud iyo maslaxadda muwaaddinka.

Qodobka 80aad

Maamulka Deeqaha Aagga Tamarta Korontada

1. Iyadoo loo raacayo xeerka iyo xeerndaaamiyayaasha maamulka maaliyadda dawladda, Wax kasta oo deeq ah ee khuseeya tamarta oo loogu deeqo dalka waxa masuul ka ah wasaaradda, iyadaana qoondaynaysa mashaariicda lagu taabbagalinayo iyo dhinacyada kala duwan ee looga faa'iidaynayo, iyadoo isla markaana korjoogtaynaysa si'waafaqsan siyaasadaha Qaranka, istaraatiijiyadaha iyo qorshayaasha tamarta korontada, si loo helo adeeg koronto oo dalka wada gaadha.
2. Si'waafaqsan barnaamijka horumarinta tamarta korontada iyo qorshaha Qaranka, deeqaha ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan waxa la marinayaa oo fulinaaya shirkadaha waddaniga ah ee ka shaqeeya aagga korontada si dadweynuhu u helaan koronto joog to ah oo tayo leh, qiimo ahaanna ay shacabku awoodi karaan.

CUTUBKA 14AAD

DEMBIYADA IYO CIQAABAHA

Qodobka 81aad

Dembiyada Ruqsadaha

1. Cid kasta oo:
 - b. Ka dhista kaabayaal ama dhiga ama ka taaga mareeg koronto qaybin meel ka baxsan xuduud dhuleedka goobta ruqsadda loo siiyay ee ku cad ruqsadda uu haysto.
 - t.. Bilaa oggolaanshiyo qoraal ah oo ka soo baxay guddida komishanka rakiba mashiinno ama kaabayaal koronto dhalin ama dhisa kaabayaal iyo layn ama xadhko koronto kormara ama hoos mara dhulka.



- j. Isagoon guddida komishanka oggolaansho ka haysan wareejiya ruqsad loo siiyay si waafaqsan xeerkan, wuxuu galay dembi waxaanu marka maxkamadi ku xukunto muteysan doonaa ciqaab noqon karta ganaax lacageed oo dhan konton (50) milyan oo shillin ama xadhig ciqaabeed aan ka yarayn shan (5) sanno kana badnayn toddoba (7) sannadood ama labadaba.
2. Kasakow ciqaabta ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, ruqsadlaha ku xad gudba, waxa lagu xukumi doonaa inuu ka saaro dhammaan kaabayaasha iyo xadhkaha uu ka dhisay dhulka ka baxsan xuduud dhuleedka ruqsaddiisa.
3. Qof kasta oo:
- b. Ku xadgudba waajibnimada haysashada ruqsadda qandaraaska rakibidda korontada ama shahaadada xirfadlanimada farsamada korontada ee uu dhigayo qodobka 52aad ee xeerkan ama
 - t. Cid aan haysan ruqsad qandaraasle rakibidda korontada ama shahaadada xirfadda farsamada korontada oo loo siiyay si waafaqsan xeerkan u dira ama u oggolaada inuu uga shaqeeyo rakibidda mashiinnada iyo agabka koronto dhalinta, nashqadaynta, dhisidda, hawl galinta ama dayactirka kaabayaasha iyo xadhkaha ama laynka koronto qaybinta ama koronto gudbinta ama nashqadaynta ama/iyo xidhidda xadhkaha ama khad korontada lagalinayo dhisme, wuxuu galay dembi waxaanu mutaysan doonaa ganaax lacageed oo u dhexeeya saddex (3) illaa shan (5) milyan oo shilling ama xabsi u dhexeeya sannad (1) illaa laba (2) sannadood, ama labadaba.

Qodobka 82aad **Dembiyada isticmaalka korontada**

1. Cidkasta oo:
- b. Isagoon haysan oggolaanshaha adeeg bixiyaha ee xadhig ama dabgudbiye ama qalab kale ku xidha ama geliya ama ka jara ama ka gooya xadhkaha koronto qaybinta ama gudbinta.
 - t. Isticmaala tamarta korontada isagoon oggolaansho ka haysan adeeg bixiyaha ay khusayso.
 - j.. Wax ka beddela ama u oggolaada in cid kale wax ka beddesho saacadda korontada, si uu u yareeyo ama khalkhal u geliyo tirinta caddadka korontada macmiilku isticmaalo.
 - x. U isticmaasha adeegga korontada ujeeddo ka duwan ujeeddadii uu adeegg bixiyaha kula heshiiyay.
 - kh. Cid kale siiya dhammaan ama qayb ahaan adeegga korontada, iyadoon adeeg bixiyuhu u oggolaanin
 - d. Isticmaala tamar koronto oo uu ogyahay in la soo xaday ama loo soo leexsaday, si sharci darro ah.
 - r. Jabiya ama sababa in la jebiyo ama bakhtiiya laambadaha korontada ee iftiimiya waddooyinka ama suuqa, wuxuu galay dembi waxaanu marka maxkamaddi ku hesho muteysan doonaa ganaax lacageed oo dhan shan (5) milyan oo shilling ama xabsi aan ka yarayn saddex (3) sannadood kana badnayn shan (5) sannadood ama labadaba.



2. Haddii cidda faldembiyeedka gashay yahay macmiil, ruqsadlaha wuxuu ka jarayaa macmiilka adeegga koronto, muddo aan ka badnayn muddada uu cayimo xeernidaamiye.
3. Kasakow ciqaabta uu muteysto, cidda gasha dembi ku xusan faqraddan waxa lagu xukumi doonaa in uu ruqsadlaha u magdhabo qiimaha xaddiga awoodda koronatada ee uu sida sharci darrada ah u isticmaalay ama qiimaha alaabaha jabay iyo magdhawga kale ee ku waajiba .

Qodobka 83aad

Dembiyada ka dhanka ah kaabayaasha iyo hawlgalada adeeg bixiyaha

1. Qofkasta oo si ula kac ama kas ah:
 - b. U wax yeelleeya ama isku daya in uu waxyeello u gaysto mashiinada ama kaabayaasha dhalinta korontada ama xadhkaha ama tiirarka mareegaha qaybinta iyo gudbinta shabakadda tamarta korontada.
 - t. Si sharci darro ah isu hor istaaga ama u carqaldeeya hawlgallada ama adeeg bixinta ruqsadlaha ama waxyeello u gaysta hantida iyo shaqaalaha ruqsadlaha.
 - j.. Xada ama isku daya in uu xado xadhig, tiir ama agab koronto ama la siiyo ama qaata ama loo dhiibto si uu u hayo ama u qariyo ama safriya ama iibsada ama cid u kala iibiya ama waxyeelleeya ama burburiya xadhko ama agab koronto oo uu ogyahay ama haya sabab uu ku rumaysto in la soo xaday.
 - x.. Isagoo ujeedkiisu yahay in uu helo faa'iido dhaqaale ama dhaawaco faa'iidada dhaqaale ama suuqa ruqsadle, faafiya war beena ama dacaayado ku saabsan adeegga tamar koronto ee ruqsadle ama adeeg bixiye, wuxuu galay faldembiyeed waxaanu mutaysan doonaa ganaax lacageed oo dhan tobban (10) milyan oo shillin ama xabsi u dhexeeya shan (5) illaa toddoba (7) sannadood ama labadaba.
2. Kasakow ciqaabta uu mutaysto, cidda lagu helo faldembiyeedka ku xusan qodobkan waxay masuul ka tahay laguna xukumayaa in uu ruqsadlaha u magdhabo khasaaraha soo gaadhay hantida iyo shaqaalaha ruqsadlaha, haddii ay jirto.

Qodobka 84aad

Siinta warbixin ama macluumaad been ah

Qof kasta oo komishanka u gudbiya warbixin ama qoraallo uu ogayahay in ay been tahay oo khuseeya codsi uu gudidda komishanka u gudbistay si uu u marin habaabiyo go'anka guddida wuxuu galay dembi waxaanu marka maxkamadi ku xukunto mutaysan doonaa ganaax lacageed oo dhan shan (5) milyan oo shillin ama xabsi u dhexeeya saddex (3) illaa Shan (5) sannadood ama labadaba.

Qodobka 84aad

Is-hortaag iyo carqaladayn Kormeerka ama baadhista

Cid kasta oo:

- b. si kas ah ama dhayalsi ah isaga hortaagta ama ka carqaladeeya kormeerayaasha ama baadhayaasha gudashada hawsha kormeerka ama baadhista.
- t. Isagoo karaya, diida in uu faahfaahin ka siiyo ama uga sameeyo nuqulo buugta, diiwaannada ama qoraallada ku xusan xarafka j ee qodobka 61aad ama diida in uu



gacan ku siiyo kormeeraha ama baadhaha gudashada hawsha kormeerka ama baadhista.

- j. Uu kormeere ama baadhe uu su'aalo weydiyo ama wareysi ka qaado si ula kac ah ama dhayalsi ah kormeeraha ama baadhaha u siiya ama ugu sheega xog ama war been ama marin habaabin ah oo khuseeysa hawsha kormeeraha ama baadhaha, wuxuu galay dembi waxaanu marka maxkamadi ku hesho uu mutaysan doonaa ganaax lacageed oo dhan toddoba (7) milyan oo shillin ama xabsi u dhexeeya shan (5) illaatoddoba (7) sannadood ama labadaba.

Qodobka 86aad

Masuuliyadda Dembiga ee Hay'adeed

1. Haddii dembiga ku xusan qodobbada sare ay tahay shirkad ama hay'ad, waxa ciqaabta dembi ee ka dhasha faldembiyeedkaas la saarayaa laguna xukumayaa maareeyaha iyo dhammaan xubnaha golaha agaasinka ee hay'addaas.
2. Maareeyaha ama xubinta ka tirsan golaha agaasinka hay'adda loo raaci maayo dembiga kor ku xusan, haddii uu caddeeyo in aannu ogayn ogaanna karaynin faldembiyeedka dhacay ama oggolaanin, diidmana ka muujiyay galista faldembi.

Qodobka 87aad

Masuuliyada Magdhawga ka dhasha Dembiyada

1. Haddii, faldembiyeed ku xusan cutubkani horseedo shil koronto oo dhaliya khasaare nafeed ama dhaawac ama khasaare hantiyeed, cidda faldembiyeedka lagu helo ayaa ka masuul ah bixinta magdhawga khasaaraha hantiyeed, nafeed ama dhaawaca ka dhashay faldembiyeedkaas.
2. Shirkadda ama hay'adda loo shaqeeyaha ah ayaa loo arkayaa in ay tahay cidda gashay dembiga ku xusan qodobbada sare ee xeerkan, haddii aan la caddayn in shaqaaluhu galay dembiga isagoo iska indho tiray ama dhayalsaday u hoggaansanaanta awaamiirta iyo habraacyada loo shaqeeyuhu u dajiyay.

CUTUBKA 15AAD

QODDOBO KALA DUWAN

Qodobka 88aad

Sanduuqa Horumarinta Tamarta Korontada

1. Wasiirku waxa uu aasaasi doonaa sanduuq loogu yeedhi doono "Sanduuqa Horumarinta Tamarta korontada".
2. Sanduuqa Horumarinta Tamarta Korontada wuxuu noqon doonaa sanduuq gaar ah oo lagu maalgalin doono:
 - b. Dhiska, kobcinta iyo tayaynta kaabayaasha muhiimka ah ee tamarta korontada.
 - t. Dhiirrigalinta iyo horumarinta tamarta cusboonaata.
 - j. Mashaariicaha koronto galinta miyiga.
 - x. Mashaariicaha ku waajahan isku filaanshaha iyo tashiilka tamarta korontada iyo Kh.Cilmibaadhista, dhiirrigalinta iyo kor u qaadidda tiknoolajiyadda tamarta korontada.



3. Maaliyadda Sanduuqa Horumarinta Tamarta Korontadu waxay ka imanaysaa ilahan soo socda:
 - b. Qoondayn miisaniyadeedka sanad walba looga qoondeeyo miisaaniyadda Qaranka.
 - t. Lacagaha ka soo xarooda ganaax lacageedyada ka dhasha dembiyada xeerkani dhigayo.
 - j. Qaadhaan sannadeed ay bixinayaan ruqsadlayaasha tamarta korontadu
4. Wasiirku wuxuu ku leeyahay dhaqaalaha sanduuqa awoodaha qorshaynta, qoodaynta iyo korjoogtaynta, iyadoo deeqaha loo raacaayo sida uu dhigaayo qodobka 80aad, faqradihiisa 2aad iyo 3aad.
5. Hannaanka maamulka sanduuqa iyo habraaca dhaqaalaha loogu shibaayo, saxeexa iyo hannaanka isticmaalka maaliyadda lagu shubay waxaa xeerhoosaad kusoo saari doona wasiirka si waafaqsan Xeerka Maamulka iyo Maaliyadda Dawladda.

Qodobka 89aad

Xidhiidhka xeerkan iyo mabaadii'da Xeerka Cigaabta Guud iyo Habraaciisa

1. Xeerkani meesha kama saaraayo mabaadii'da guud ee Xeerka Cigaabta Guud ee Qaranka ee ku xusan qodobadda 1aad ilaa 183 ee Xeerka Cigaabta Guud, kuwaas oo la socon karaaya cutubkan 14 aad ee xeerkan ee la xidhiidha dambiyada iyo cigaabtooda, haddii aanay si cad uga hor imanayn qodob ama qodobbada ka mid ah xeerkan.
2. Haddii uu qodob ama qodobbada ka mid ah xeerkan iyo xeerka cigaabta guud amaba xeerarka kale ee dhaqangalka ah ee dalku iska hor yimaadaan waxa mudnaanta yeelanaaya qodobka ama qodobbada xeerkan.
3. Hannaanka xadhigga, baadhista, oogista dhegaysiga iyo guud ahaan habka dacwad wadista ama dhegaysiga ee xeerkan ka dhalata waxa loo raacayaa Xeerka Habka Cigaabta ee Qaranka.
4. Dhammaan xoriyaadka eedaysanayaasha lagu eedeeyo qodobbada jidaynaaya fal dembiyadda ee xeerkan waxaa loo raacayaa Dastuurka JSL iyo Xeerka Habka Cigaabta.

Qodobka 90aad

Reebannaanta Faafinta ama bixinta Xogaha sirta ah

1. Haddii aanay kalifin ama dhalinaynin gudashada waajibaadka shaqo ee komishanku ama aanay amrin maxkamadi, qofna ma faafin karo ama ma bixin karo qoraal ama war ama xogaha ku duuggan qoraallada uu qofkaasi ku ogaaday ama ku helay fulinta waajibaadyadiisa ama hawlaha shaqo ee khuseeya xeerkan.
2. Qofka ku xadguba faqradda 1aad ee qodobkan wuxuu galay faldambiyeed, wuxuuna ku mutaysan doonaa ganaax lacageed toddoba (7) milyan oo shillin ama xabsi cigaabeed oo u dhexeeya shan (5) ilaa toddoba (7) sannadood ama labadaba.
3. Qofka hela ama ogaada war, qoraal ama xogo uu ogyahay ama ogaa in lagu soo helay si xad gudub ku ah faqradda 1aad ee qodobkan ee faafiya ama cid kale siiya qoraal, war ama xogahaasi, waxa uu galay dembi wuxuuna ku mutaysan doonaa ganaax lacageed ama xadhig cigaabeedka ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan.



Qodobka 91aad

Adeeg bixiyayaasha jira iyo Muddada Kala Guurka

Adeeg bixiyayaasha korontada ee jiray ka hor dhaqangalka xeerkan waxa ay ahaan doonaan kuwo sidoodii u sii jiraya, waxase waajib ah in adeeg bixiyayaashaasi ay muddo afar iyo labaatan bilood gudahood (24) ah oo ka bilaabanta taariikhda uu xeerkani dhaqangalo ay ku kala saaraan hawlhooda koronto dhalinta iyo qaybinta korontada oo ay u soo buuxiyaan heerarka uu xeerkani jideeyay, kaddibna ku soo dalbadaan kuna qaataan ruqsad ama ruqsado cusub oo la siiyo si'waafaqsan xeerkan iyo xearnidaamiyaha ruqsadaha.

Qodobada 92aad

Xearnidaamiyayaasha iyo Xeerhoosaadyada

1. Wasiirku wuxuu kaddib, marka uu helo soo jeedinta komishanka, soo saarayaa dhammaan xearnidaamiyayaasha lagama maarmaanka u ah hirgalinta iyo habsami u fulinta qodobbada xeerkan ee khuseeya nidaaminta iyo isticmaalka tamarta korontada.
2. Xearnidaamiyayaashu waxa ay noqon doonaan kuwan soo socdaa:
 - b. Xearnidaamiyayaasha ruqsadaha koronto dhalinta, koronto gudbinta iyo iibka tafaariiqda adeegga korontada.
 - t. Xearnidaamiyaha ruqsadda qandaraaslayaasha farsamada korontada iyo bixinta shahaadada xirafadlanimada farsamada korontada.
 - j. Xearnidaamiyaha dejinta iyo go'aaminta khidmadahaha iyo qiimaha adeegga korontada.
 - x. Xearnidaamiyaha koronto dhalinta.
 - kh. Xearnidaamiyaha gudbinta korontada iyo hawgaliyaha nidaamka koronto gudbinta
 - d. Xearnidaamiyaha koronto qaybinta iyo iibka tafaariiqda korontada
 - r. Xearnidaamiyaha bedqabka iyo caafimaadka bulshada iyo dhawrida deegaanka.
 - s. Xearnidaamiyaha halbeegyada tayada adeeg bixinta iyo adeegga korontada iyo
 - sh. Xearnidaamiyaha halbeegyada tayada qalabka korontada.
 - dh. Xearnidaamiyaha habraaca nidaamka isku xidhka nidaamka shabakadda koronto gudbinta.
 - c. Xearnidaamiyaha Xalinta khilafaadka iyo racfaanada Korontada;
 - g. Xearnidaamiyaha ilaalinta macaamiisha, iyo nidaamka baadhista iyo diyaarinta warbxinaha baadhista shilalka iyo khataraha ama waxyeellooyinka ka dhasha korontada.
 - f. Xearnidaamiyaha xaq adeegsiga iyo marin u helidda dhulka ee adeeg bixiyaha iyo ka hortagga waxyeellooyinka iyo khataraha korontada ee dadka, duunyada, hantida iyo deegaanka.
 - q. Xearnidaamiyaha qaabka diyaarinta warbxinaha adeeg bixiyayaashu u gudbinayaan komishanka.
 - k. Xearnidaamiyaha dhalinta, qaybinta iyo isticmaalka tamarta korontada cusboonaata.
 - l. Xearnidaamiyayaasha kale ee lama huraanka u ah nidaaminta suuqa iyo isticmaalka korontada ee xeerkani jideeyo soo saariddooda.



3. Komishanku wuxuu soo saari karaa oo uu baahinna doonaa habraacyo, hagayaal, awaamiir ama xeerhoosaadyo aan ka hor imanaynin xeerkan iyo xeeridaamiyayaasha ka farcama xeerkan iyo xeer kale oo dhaqangal ah ee uu hadba u arko inay ku habboon tahay ama lagama maarmaan u tahay fulinta hawlaha nidaaminta korontada ee Komishanku u xilsaaran yahay.
4. Xeeridaamiyayaasha; hagayaasha, habraacyada, awaamiirta iyo Xeerhoosaadyada loo soo saaro si waafaqsan qodobkan waxay dhaqangalayaan marka lagu baahiyo faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Qodobka 93aad

Dibu'eegista Go'aannada Maamul ee Komishanka

- 1- Dhammaan go'aannada guddidu waxa dibu'eegis looga qaadanayaa si waafaqsan Xeerka Habka Madaniga (XHM) Maxkamadda Sare ee JSL.
- 2- Waxay dhinacyadu dib u eegista ugu gudbinayaan maxkamadda sare mudo 30 cisho gudaheeda oo laga soo bilaabo taariikhda uu go'aanku soo baxay
- 3- Go'aanka Maxkamadda Sare wuxuu noqonayaa kama dambays, haddii aan dib u eegis dhinacayada mid kood aanu ka dalban Maxkamadda si waafaqsan Qodobka 266 ee XHM.

Qodobka. 94aad

Nasakhid iyo ka reebid

1. Xeerkani waxa u nasaqay Xeerka Tamarta Korontada ee Xeer Lr.81/2018,
2. Qodobbada iyo qaybaha xeeridaamiyayaasha, xeerhoosaadyada, habraacyada, hagayaasha, si waafaqsan xeerka la nasaqay loo dejiyay ee dhaqangalka ahaa, taariikhda dhaqangalka xeerkaas ee aan ka hor imanaynin xeerkan waa lagu dhaqmayaa illaa iyo inta la waafajinayo xeerkan.

Qodobaka 95aad

Dhaqangal

Xeerkani waxa uu dhaqangalayaa marka ay golayaasha xeer-dejintu (Guurtida iyo Wakiillada) ansixiyaan, Madaxweynuhu saxeexo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah.

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL

Md. Yaasiin Maxamuud Xiir (Faratoon)
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL